# Axdi Sharafeedka Dacwada


**WQ**

**Dr. Hisham al-Dalib**

**WT**

**Maxamed Deeq**



**Dr. Hisham Yaxya al-Daalib**

Dr. Hisham Yaxya al-Daalib waxa uu ku dhashay dalka Ciraaq sanadkii 1940, waxa uu shahaadada Bsc ee Injineernimada ka qaatay jaamacadda Leverpool ee Boqortooyada Midawday (UK) sanadkii 1962, shahaadada PhD ee Injineernimadana waxa uu ka qaatay jaamacadda Purdue ee gobolka Indiana, USA, sanadkii 1974.

Waxa uu ku biiray hawlaha dacwada Islaamka xilligii uu ardayga ka ahaa waqooyiga Ameerika, tan iyo maantana hawlaha dacwada ayuu wax ka wadaa, waxa uu hay'ado badan oo Islaami ah ka qabtay xilal kala duwan oo ay ka mid tahay agaasimihii ugu horeeyay ee agaasinka tabarada hogaamineed ee hoos taga Ururka Ardayda Muslimiinta ee Maraykanka iyo Kanada, sanadihii 1975-1977, waxa uu sidoo kale qabtay xilka xoghayiha guud ee Midawga Islaamiga Caalamiga ah ee Ururada Ardayda sanadkii 1976, waxa uu ku qabtay tababaro badan oo dhanka hogaaminta ah iyo xalaqooyin cilmi gudaha waqooyiga Mareykanka iyo dibadiisaba.

Dr. Hisham waa xubin wax ka aasaastay Mac-hadka Caalamiga ah ee Fikriga Islaamiga ah sanadkii 1981, iyo Hay'adda kheyriga ah ee Saar 1983-1985, waana qoraaga buugga caanka ah " Tusaha Tabobarida Hogaamineed" kaasoo lagu tarjumay in ka badan 20 luqadood, xilligan Dr. Hisham waa agaasimaha arrimaha maaliyadda ee Mac-hadka Caalamiga ah ee Fikirka Islaamka, xaruntiisa Washington, USA.

# Axdi Sharafeedka Dacwada

**Dr. Hisham al-Dalib**

© Hisham al-Dalib, 2009

Xuquuda buugani wey dhawrsantahay, lama daabici karo dibna looma soo saari karo asaga oo dhamaystiran iyo asaga oo qeyb ahba iyada oo aanan ogaalansho qoraal ah laga helin qoraaga buugga.

Hisham al-Dalib

P.O.Box 669, Herndon, VA 20172,USA

ISBN 978-0-615-30883-8

## Gogoldhig

Dacwada Islaamka waa hawsha ugu muhiiimsan, uguna fadliga badan ee ban'iiaadmku qabto, waa hawshii iyada darteed uu Alle u soo diray Nabiyaal iyo Rusul, waa hawl si isadaba jog ah ay ugu hawlanaayeen Awliyada, Saalixiinta, Muslixiinta, Culimada iyo inta wanaagga jecel.

Sida had iyo jeer dhacdana hawlkasta waxa ay leedahay sare u kac iyo hoos u dhac, dacwada Islaamkuna waxa ay xaqijisay marar badan sare u kac suuro geliyay iney si aad u ah faafto, xarumo bandanna ku yeelato adduunyada daafaheeda, mararka qaarna waxaa ku imanayay hoos u dhac sababa inay marti ku dhex noqoto dalalka muslimiinta ah, arrinkaana waxaa tilmaamaya xadiiska Rasuulkeena Muxamed (SCW) " Islaamku waxa uu bilawday isaga oo ghariib ah, mar kale ayuuna ghariibnimada ku laaban doonaa, kuwa xilligan diinta iyo hawlaheeda u taaganna "alghuraba" abaablgudkooda waa Jannada" waxaa wariyay Muslim, No (145), (1/130).

Xilligan aan maanta joognana dacwada Islaamku waxa ay horumar aad u balaalarn ka samaysay dhinacyo badan oo la xiriira tacliinta, dhaqaalaha, arrimaha bulshada, shraciyada, iyo hababkii lagu ilaalin lahaa qiyamka iyo haybta muslimiinta, taasoo keentay inay kasbato dad badan oo aan muslimiin ahayn, kuwaasoo ka helay diinta Islaamka dhexdeeda xal ka bogsiiya mashaakillo badan oo ay la il darnaayeen. Dhanka kalana waxaa jira caqabado badan oo dhibaato ku ah hor u socodka dacwada kuwaa oo ka imanaya dhinacyada la falgalka siyaasadda iyo arrimaha caalamiga ah, iyadoo dagaalada hubaysan oo ay ku jiraan kooxo muslimiin ah oo sheeganaya inay u gargaarayaan Islaamka, iyo is riixriixa siyaasadeed ee ka jira dunida Islaamka oo ay dhinac ka yihiin ururo iyo xisbiyo siyaasadeed oo Islaami ah ay sababeen in dacwada Islaamku yeelato cadaw faro badan, kuwaasoo u arka inay khatar ku tahay dacwadu danahooda iyo jiritaankoodaba.

Waxaa intaa dheer ducaadda dhexdooda oo aan ka midaysnayn waxyaabo tiro badan, taasoo horseeday soo if baxa kala duwanaansho xagga fekerka iyo hawlqabadka ah oo mararka qaar ka dhex abuura ducaadda dhexdooda dagaal iyo iska hor imaadyo halakeeya habsami u socodkii dacwada, dadkana ka sii jeediya inay u dhag raariciyaan baaqyada ducaadda maadaama ay yihiin kuwa dhexdooda ka dirirsan oo aanu dhaqankoodu toosnayn.

Haddaba bug-yarahan uu qoray Dr. Hisham al-Dalib oo muddo nus qarni ka badan ku hawlanaa hawlaha dacwada waxa uu soo bandhigayaa qodobo xal u noqon kara caqabadaha haysta dacwada Islaamka iyo ducaadda ku hawlan faafinteeda, kuwaasoo isuga jira khibradiisa iyo xikmado uu ka kororsaday culimo kale, faa'iidada ay ducaadda u leeyihiin ka sokowna qodobadani waxa ay horseed u noqon karaan ambaqaadka xal guud oo loo helo guud ahaan caqabadaha gudaha iyo kuwa debadda ee hor taagan dacwada Islaamka.

Ugu dambayn waxaa mahad ballaran iska leh Maxamed Deeq oo waqti badan ku bixiyay tarjamada bug-yarahan, taasoo suurogal ka dhigysa in ducaadda iyo dadweynaha Soomaaliyeed ay si fiican ugaga bogtaan bug-yarahan. Waxaanan Alle uga baryayaa in qoraaga iyo tarjumaankaba uu ajar iyo xasanaad ka siiyo hawshan qiimaha badan oo ay qabteen.

Maxamed Axmed

Muqdisho, June 2014

## Fekredda Axdigan

Waa u yeeritaan guud ahaan muslimiinta, iyo gaar ahaan ducaadda loogu yeerayo inay isugu yimaadaan oo ku kulmaan qodoba dhawr ah iyo mabaadi' si wadar ahaan ah u samaynaya axdi sharafeed u gaar ah dacwadda, iyo dastuur dhaqameed xagga fekerka iyo hawlgalka ah, taasoo kordhinaysa baaxadda heshiiska, saxsanaanta, iyo firfircoonida, taasoo yaraynaysaa baaxadda khilaafka, gefafka iyo hawlgabka.

## Hordhac

Waxaa ku baahaya calaamka islaamka baraarug diineed ballaaran taasoo ah muuqaal wanaagsan oo barakaysan, oo ku tusinaya soo jeedka umadda muslimiinta, iyo in ay ka kacday halmaankii ay ku jirtay, dareentayna shakhsiyadeeda, iyo inay ku faanto diinteeda, dedaalna ku bixiso inay ka baxdo xaaladda dib u dhacasanaanta, kana xorowdo daba socodka xagga fekerka iyo nolosha loo daba socday dad kale, arrintaan baraaruga ah waxaa erey bixinta casriga ah loogu yeeraa ( baraaruga islaamiga ah).

Waxay doonista alle noqotay – mahad ha ka gaartee- in baraaruga islaamiga ah uu gaaro dalal ka baxsan kuwa muslimiinta, halkaa oo ay ku sugan yihiin jaaliydo muslimiin ah oo ugu hijrooday dalalkaa in ay wax ka bartaan am ka shaqaystaan. Waxa ay jaaliyadkaa mahad iyo bogaadin ku mutaysteen inay ka hawlgaleen sanadihii ugu dambeeyay inay ka shaqeeyaan sidii ay salka ugu dhigi lahaayeen dacwad Islaami ah oo habaysan, taasoo leh culimo marjac ah oo ka shaafiya masaa'isha diiniga ah iyo kuwa dunyawiga ahba, iyo culimo marjac ah oo ku xeeldheer dhanka maamulka iyo maareynta, kuwaasoo ka xalliya mashaakilkooda, una dejiya qorshayaal, isla markaana matala marka ay la xaajoonayaan hay'adaha rasmiga ah ee ka jira dalalka ay ku nool yihiin.

Arrinkanina waa guul macno weyn oo ku tusaysa inay jaaliyadahani ka gudbeen baahiyihii koobnaa sida kuwa uu tabayo arday wax ka baranaya meesha, ama qof booqasho ku maraya dalka, ama nin cayr ah oo oo soo xoogsi tagay, sabatuna waxa ay tahay in dhamaan dadkaasi si kasta oo ay awood u leeyihiin, akhyaarna u yihiin, xaaladoodu waa mid kooban, awoodooduna waa ay xadidantahay, dedaalkooduna waa uu wanaagsan yahay, hase yeeshee waa mid faa'iidadiisa iyo waxtarkiisuba ay kooban yihiin.

## Muuqaalada Baraaruga

Baraarugan barakeysan waxa uu yeelan karaa muuqaalo kala duwan ayadoo loo eegayo duruufaha ku hareraysan, mararka qaar waa xarun islaami ah, marka loo eego muslimiinta qurbaha ku nool qaarkood, ama waa masjid, shirkad maalgashi, hay'ado maaliyadeed, mashaariic amaah siisa dadka guryo ay dagaan u baahan, majalad, jariirad, ama waa barnaamij hal abuur, tarjumid iyo faafinta kutubta, ama waa ergo dacwadeed ay dirtay hay'ad Islaami ah, ama waa koox rabta in ay ka hirgeliso shareecada Islaamka dal muslim ah, ama waa dhaqdhaqaaq u halgamaya in uu dal islaami ah ka xoreeyo gumeysi… iwm.

Waxaan shaki ku jirin in arrimaha aan kor ku soo sheegnay dhamaantood ay yihiin kuwa lagu farxo oo mudan dhiirigelin iyo duco, isla markaana ay mudan yihiin in la toosiyo, la turxaan bixiyo, wadada saxda ahna lagu hago.

## Arrimo Kala duwan oo Saameyn ku leh Baraarugga

Baraarugan waxa uu ka soo askumay ama ka dhashay koox dadaallo ah oo loo qabtay si wadar ah ama kali ah, si nidaamsan ama si aan nidaamsanayn, si rasmi ah oo dawladeed, ama si shacbi ah oo aanay dawladdu shaqo ku lahayn.

Intaa ka horna waxaa la dhihi karaa waa bandhig aan ku talogal ahayn oo ku salaysan fidrada asalka ah ee qofka muslimka ah taasoo astaan u ah rabitaanka ummaddu rabto inay u laabato asalkeedii xaqiiqiga ahaa, iyo xujo cad oo tibaaxaysa in diinta Islaamku tahay mid waaraysa oo uu Alle (CW) xafiday, dhawryna.

Qofka baaritaan ku sameeya baraarugan, rabana inuu wax ka qoro taariikhdiisa, waxaa ku adkaaneysa inuu helo waqtiga uu soo bilawday oo sax ah, sababtoo ah baraarugan iyo arrimaha la halmaala waxa ay leeyihiin xidido qoto dheer, taasoo barna ay muuqdaan barna aysan muuqan, iyo dadaalo soo jireen ah oo marna muuqda marna dahsoon, intaa kadibna shaqada dacwadu waa mid joogto soo ahayd, sii ahaan waari doonta, mararka qaar waa mid sii liicaya, marna soo xoogaysanaya, mararka qaar wuu gefayaa hadafkiisii, marar kalana wuu haleelayaa, mararka qaar waa uu jirranayaa, marar kalana waa uu caafimaadayaa, laakiin waaritaanka shaqada dacwada waa sunno kawni ah, sunooyinka Allena ma baaba’aan is mana bedelaan.

**Guuldaradii 1967**

Sanadkii 1967 waa sanad muhiim u ah taariikhda baraaruga, guuldaradii Carabta ku dhacday dagaalkii ay la galeen Israa’iil, waxa uu gigilay Carabta hadday ahan laheyd dhanka nafsiga, fikirka, siyaasadda, bulshada, iyo milatariga intaba, sidoo kale, jabkaasi waxa uu dhaliyay in dadweynuhu u caroodaan hogaamiyaashii horseedka ka ahaa guuldarada, iyo mabaadii’dii ay haysteen, haddii ay ahaan laheyd kuwa ah Kacaan, Cilmaaniyad, Shuuciyad, Libaraaliyad, Qawmiyad, iyo Bacthiyad, fikrahadaas oo ay dadku ka sii jeesteen oo ay naceen, isla markaana ay bilaabeen inay baadigoobaan wax ka duwan, iyaga oo abbaaray dhanka Islaamka, taasoo ah arrin aan la yaab lahayn maadaama dadku muslimiin yihiin, dadkuna sida ay qof-qof Alle ugu laabtaan

marka ay dhibaatooyin  iyo shiddo la kulmaan, kooxuhuna sidoo kale, ayeey Alle ugu laabtaan.

Hadaba sidaa darted waxaa la dhihi karaa guuldaradii 1967 waxa ay siisay baraaruga Islaamka awood dardargelineed, sidaa darteed waa astaan muhim ah oo ka mida astaamaha taariikheed, waxaana halkaa ka bidhaamay xikmadda Alle ee ka soo dhex saartay sharka dhexdiisa kheyr, kheyrka dhexdiisana shar, sidoo kale waxa halkaa ka bidhaamay xikmadda Alle ee ka dhigtay xeerka is riix-riixa, xeer joogta ah, iyadoo awood kasta oo dhulka guudkiisa ka jirta – ha doonto ama ha diidee- ay tahay mid ku sugan dhaqdhaqaaq joogto ah, taasoo marna wax riixaysa marna iyada la riixayo, dhaqdhaqaaqan joogtada ah dhexdiisa ayayna timaadaa fursadda ay helayaan qolyaha kheyka wada iyo kuwa sharka wada, muslimiinta iyo kuwa aan muslimiinta ahayn, kuwaasoo ama ka faa’iideysta fursadda ama dayaca, taasoo ku xiran hadba sida ay ula falgalaan fursadda taagan, si karti iyo firfircooni ku dheehan tahay, ama si caajisnimo iyo taag darri ah.

## Xeerka is Riix-riixa

Naxariista Alle (CW) wanaageeda waxaa ka mida in dhamaan xeerarka uu u dejiyay dunidan ay yihiin kuwa dhexdhexaad ah oo aan qolana u xaglinayn, qolana ku xadgudbaynin, soona dhaweynaynin qolo kale, taasoo ay dhamaan dadku u wada siman yihiin, qofkii si fiican ula falgala waa uu ka lib keenaa, qofkii la falgali waayana waa uu ku khasaaraa. Faa’iidooyinka uu xeerka is rii-riixu leeyahay waxaa ka mida; waxa uu rajo u abuuraa ducaadda oo uu u diyaariyo fursado, noloshana waxa uu ka ilaaliyaa inay ajawdo oo ay fasaad meel kula engegto, intaa kadibna waxa uu xasuusinayaa qofka muslimka ah had iyo jeer in boqorka dhabta ah ee kawnkan uu yahay Alle (CW), arrinkaa oo qofka muslimka ah siinaya kalsooni dheeraad ah iyo xasilooni, talo

saarasho Alle uu talo saarto iyo firfircooni, iyo degenaasho xagga qalbiga ah.

Alle (CW) waxa uu quraankiisa ku leeyahay " وَلَوْلَا دَفْعُ اللَّهِ النَّاسَ بَعْضَهُمْ بِبَعْضٍ لَفَسَدَتِ الْأَرْضُ وَلَٰكِنَّ اللَّهَ ذُو فَضْلٍ عَلَى الْعَالَمِينَ" “ Hadayn jirin ku reebidda Eebbe dadka qaarkood qaarka (kale) waxaa fasaadi lahaa dhulka hasayeeshee eebbe waa fadli u saaxiib ( deeqe) caalamka” al-Baqara: 251.

Qofkii dib u eega wixii ka dambeeyay guuldaradii 1967 waxa u soo baxaya inay ummaddu dedaal ku bixisay inay ka gudubto guuldaradaas, waxaynka ku guulaystay inay xaqiijiso in door ah oo kamida dedaaladeedii, waxaana marqaati u ah dagaalkii ay la gashay Israa’iil sanadkii 1973, iyo jabkii ay gaarsiiyay gumaysigii Midawga Sofiyeeti ee Afgaanistaan sanadkii 1989.

**Burburkii Midawga Sofiyeeti**

Waxaa sii kordhayay guulihii baraarugu ka soo hooynayay daafaha caalamka, guulahaasoo aan ka marnayn qaddar gafaf ah oo kala mug ah, marka loo eego xilliyadii kala duwanaa ee ay dhacayeen, iyo goobihii ay ka dhacayeen, iyo dugsiyadii dacwada ee ay ka dhacayeen, ha yeeshee gafafkani ma ahayn kuwa meesha ka saaraya hawlihii wanaagsanaa oo uu baraaruga Islaamku qabtay, mana ahayn mid horjoogsaday horumarkii isdaba joogga ahaa ee uu ku tilaabsanyay, tan iyo markii uu yimid isbadal weyn oo gilgilay caalamka oo idil kaasoo ah burburkii Midawga Sofiyeti sanadkii 1991.

Burburkan ku dhacay Midawga Sofiyeti oo ay sababtiisu lahaayeen dadyawgii ku midaysnaa dalkaa, waxa uu keenay in ay dawalddii weynayd ay u qeybsanto dawlado yar yar, isla markaana uu burburo nidaamka shuuciyadda ee Alle diidka ahaa, kaasoo dagaal ba’an kula jiray guud ahaan diimaha iyo gaar ahaa diinta Islaamka, sidaa darteed burburkani waxa uu keenay in uu meesha ka baxo nidaam siyaasadeed

weyn oo in muddo ah rafaad iyo dhibaatooyin ba'an ku hayay Islaamka iyo muslimiinta, waxaana halkaa ay dacwada Islaamku ka heshay fursad weyn, iyadoo awood u yeelatay inay ku baahdo deegaandii uu ka talin jiray nidaamkaa burburay, oo ay ka soo hooyso guulo wax ku ool ah. Gilgilkan waxa uu sidoo kale ka mid yahay miraha laga helay xeerka is riix-riixa, mar hore iyo mar dambana taladu waa tan Alle.

## Burjiyadii New York

Toban sano kadib waxaa timid dhacdo saddexaad oo weyn oo dunida gilgilshay, taaso ah burburkii ku dhacay labadii dhismood ee waaweynaa ee xaruntii ganacsiga caalamiga ah ee ku yaalay New York, sanadkii 2001, Dhacdadan oo ay fasirideeda iyo falanqaynteeda aad la isugu khliaafay, waxayna u badan tahay inay ahaato mid kamid ah halxiraalayaasha taariikhda, hase yeeshee arrimihii ka dhashay oo isugu jiray kuwa warfaafineed, kuwa siyaasadeed, kuwa dhaqaale, milatari iyo dhaqanba, ayaa waxa ay ka dhigeen Islaamka mid ay ka sheekeystaan cid kasta oo dunida guudkeeda saaran, kuwaasoo intooda badan uga hadlaya si jahali ku dheehan, iyada oo dadka si sax ah oo cadaalad ku dhisan uga hadlaya ay ahaayeen kuwa aad u kooban, ha yeeshee sheekadaa Islaamka laga sheekeynayo teeda wanaagsan iyo mideeda xunba waxa ay Islaamka ka dhigeen mid si gooni ah ay u xiiseeyaan dadyow fara badan, taasoo ah fursad aad u wanaagsan oo ugu baaqaysa in ducaada Islaamku ay hagaajiyaan wadada ay dacwadooda ku soo bandhigayaan, arrinkanina waa natiijo wanaagsan oo ka dhalatay xeerka is riix-riixa, mar hore iyo mar dambama taladu waa tan Alle.

Tanina waxa ay u muuqataa in Alle (CW) oo ay xikmaddiisu xeel dheertahay, uu doonay in dhacdooyinkaa iyo kuwa iman doonaba ay gogol xaar u noqdaan in dunida aqbasho diinta toosan ee Islaamka, kadibna bulshaweynta caalamku ka baxdo baadinimada oo ay qaadato hanuunka, sidoo kalana ka baxdo dhibaatada oo ay gaarto liibaanta.

## Wacyi Muhiim ah oo loo Baahanyahay

Si kastaba arrinku ha ahaadee waxaa ummadda laga doonayaa in ay garasho iyo wacyi wanaagsan u yeelato arrimaha soo socda:

1- Fursaddan naadirka ah ee dadka lagu barayo islamka ma sii jiri doonto haddii aanay ducaadda kartida leh ee mukhlisiinta ah aanay si wanaagsan ula falgalin.

2- Sunnooyinka Alle (CW) iyo nidaamka kawonkan uu u abuuray  ma siinayso ummaddaan guul iyo horumar bilaash ah keliya in ay muslimiin yihiin.

3- Waxaa haboon in tiro kamida aqoonyahanka caqliga badan ee muslimiinta ah ee kartida iyo hufnaanta ku sifoobay ay u istaagaan sidii ay u tiro koobi lahaayeen  gefafka ay suurogal tahay in ay ducaadda ka dhacaan ka hor inta aysan dhicin, isla markaana ay ka digaan, iyo in gefka xal loo helo haddiiba uu dhaco iyada oo la yarayno khasaaraha uu geysan karo.

4- Waana inay ka shaqeeyaan sidii ay saadaal cilmiyaysan ugu samayn lahaayeen mustaqbalka dacwada, wadooyinka iyo qalabka ay adegsanayso, taasoo ka badbaadinaysa in dacwadu hawlgab noqoto.

5- Waana inay ka shaqeeyaan toosinta iyo turxaan bixinta habsami u socodka iyo hanuuninta dacwada.

6- Waana inay ka shaqeeyaan sare u qaadida baaxadda isfahamka ducaadda dhexdooda ah, iyo yareynta baaxada khilaafka.

## Mushkilado iyo Digniino

Dhab ahaantii baraaruga islaamku waxa uu ku yimid qaddar Alle, dadkuna waa ku farxeen, oo bishaaraysteen, waxayna bilaabeen in ay ku dul dhisaan qorshayaashooda quruxda badan.

Hadaba si ay arimahaasoo dhan noogu cadaadaan waxaa muhim ah in hoosta laga xariiqo in baraarugan wanaagsan ay ku hareeraysan yihiin mushkilado badan oo dhibaataynaya, isla markaana horjoogsanaya horumarkii uu ku tilaabsan lahaa, dabadeedna waxaa soo baxaya khilaaf ka dhex dhasha ducaadda, oo gaara heer colaadeed, abuura fitnooyin, kadibna colaadaha iyo kala qeybsanaanta ayaa baahda, ilaa ay dadka qaar u muuqato in khilaafka u dhexeeya muslimiinta guud ahaan iyo ducaadda gaar ahaan uu yahay xaqiiqo dhab ah, iyo cudur halis ah, oo aanu ka badbadaaynin qof Alle uu badbaadiyo mooyee.

Waxaa intaa dheer in dedaalo badan oo ikhlaas ku dheehan ay nuqsaan ka haysato dhanka saxsanaanta, iyadoo aad arkayso dhaqaale badan oo dan la’aan loo bixinayo, mararka qaarna waxa aad arkaysaa iyaga oo ku talaabsanaya arrin laga wanaagsan yahay oo aan banaanayn iyadoo ay muuqato talaabadii wanaagsanayd oo banaanayd, mararka qaarna waxaa dhaqaalaha lagu bixiyaa wax dhibaato keenaya.

Waxaa kaloo jira in inta badan dadka dacwada ka shaqeeya ay yihiin dad niyad ahaan wanaagsan laakiin ay hoosayso aragtidooda iyo aqoontooda guud taasoo gaarsiisan heer aysan kala saari karin khataraha iyo dhibabaka jira, taasoo sahal ka dhigaysa in lagu dhex dhuunto kadibna cagaha loo geliyo falal khatar ah oo ku xambaara inay sameeyaan falal doqonimo, iyo is biimayn halaag keenta, taasoo dhibaataysa lafahooda iyo guud ahaan dalalka iyo adoomada Alle intaba, taasoo keenta carada dadka ay u caroodaan kuwa falka sameeyay iyo diinta Islaamkaba, cabsina ka gelisa, meesha ugu weyn ee jahliga qolyahaa uu ka soo baxayo waa dhanka siyaasadda, waxaana jira in dedaalo badan ay ka geysteen dhanka siyaasadda oo ay naf iyo maalba u hureen, kadibna ay noqdeen qolyihii ugu horeeyay ee ku waxyeeloobay, waxa ay bixiyeen qiimo aad qaali u ah, halka sidoo kale dalaka iyo

dadkuba ay ka bixiyeen qiimo aad u sareeya, kaasoo aad khatar u ah una fool xun.

Waxaan shaki lahayn in muuqaalka caynkaa ah aan loo tiirin karin hal sabab, balse ay lama huraan tahay in loo celiyo sababo badan oo oo is dhexgalaya, oo is dul saran, kalana duwan, kuwaasoo qaarkood ay yihiin kuwa toos ah iyo kuwa aan toos ahayn, khaladaadka qaarkood waa kuwa ku yimaada aragti gaabni iyo dhoohanaan, ama dagdag iyo qorsha la’aan, ama sahlanaanta in si dhibyar loo soo dhax galo ducaada ama mushkilad lugaha loo geliyo. Waxaa kaloo keeni kara khaladaadkaas garasho la’aanta xeerarka iyo sunanka rabaaniga aha ee Ilaahay dunidaan ku maamulo, waxaa kaloo ka mid ah damac iyo hawo siyaasadeed  la huwiyay dhar diineed, iyadoo ujeedada ka dambaysa ay tahay in lagu helo dhaqaale, xukun, iyo aar goosi, waxaa kaloo keeni kara karti darrada xagga fahamka iyo garashada ah, iyo garasha la’aanta dabeecadda marxalada ay ummaddu marayso, taasoo ah marxalad khatar ah oo xasaasi ah lehna culayskeedam saamaynna ku leh qeybaha kala duwan ee nolosha, taasoo ay kamid tahay dacwada Islaamiga ah.

Sidaan soo tilmaanay hadday arrintu tahay sidaa aan soo dhirindhirinay waxaa waajib nagu ah in aan go’aamino in daawadu aanay ahayn hal xal oo qura balse waxaa loo baahan yahay inay jiraan xalal dhawr ah oo is dhamaystiraya, oo is taageeraya, isna xoojinaya.

## BILLOWGA XALKA

Xalka ugu horeeya ee kamida xalalkaa ee la oran karo waa midka ugu muhimsan, waa in la saxo xeerarka guud ee haga ducaadda Islaamiga ah, sababtoo ah xeerarku waxa ay hagaan –inta badan- aragtida guud ee insaanka, hababka uu u fikiro, sababaha shaqada iyo hababka uu hawlihisa u fulinayo, sida la og yahay oo dhamaan dadku isku raacsan

yihiin in aragtida qaldan ay kugu hogaamiso dhaqan khaldan, halka aragtida toosan ay kugu hogaamiso dhaqan suuban.

Ugu horayn ma jiro qof ku doodaya in sixitaanka xeerka oo keliya ay xal u tahay mashaakilkan, hase yeesee waxaa la oran karaa wax ay kaalin weyn ka qaadan kartaa in uu yareeyo.

Baraarugan barakaysan waxa uu baahi ballaaran u qabaa toosin, turxaan bixin, iyo dib u eegis, maadaama uu yahay shaqo uu ban'iidamku qabanayo, oo sax iyo khalad intaba leh. Haddaba haddii baraaruga Islaamku yahay mid ay khatari ka soo waajahayso debedda iyo gudahaba, waxaa xusid mudan in had iyo jeer khatarta guduhu ay ka culus tahay kana dhibaato badan tahay tan debedda.

Haddii khataraha debedda ay ka imanayaan cadawga Islaamka noocyadiisa kala duwan, khatarta guduhu waxa ay ka imanaysaa baraaruga Islaamka gudihiisa, fahamka qaldan, caqliga curyaanka ah, nafta jirran, degdeg aan ku haboonayn habsami u socodka hawlaha, aragtiyaha khayaaliga ah eek a fog waaqaca, … iwm

Tanina waxa ay abuuraysaa baahida loo qabo Axdi Sharafeed loo soo bandhigo ducaadda ku hawlan dacwada Islaamka, kaasoo qaadaa-dhigaya xeerarka aasaasiga ah ee meel isugu keeni kara dhamaantood, amaba intooda badan, Axdigaa oo ah mid si dhab ah u taabanaya dhinacyo badan, oo aad u ballaaran oo ay wadaagi karaan, kuna kulmi karaan waxgaradka iyo dadka uu hamiga ballaaran ku hayo mustaqbalka baraaruga Islaamka, taasoo ogolaanaysa kala duwanaasho xayndaabka guud ee lagu kulansan yahay dhexdiisa, sababta oo ah suurogal ma aha in dadku dhamaantood noqdaan koobiyaal isu eg oo ka midaysan wax kasta, arrinkaasna waxaa loogu yeeraa " Kala duwanaasho xayndaabka guud dhexdiisa ah".

Sidaa darteed, iyada oo aan dareemayno mas'uuliyadda ay amaanadu leedahay, iyo u sare kaca waajibka toosinta, turxaan bixinta, iyo cusboonaysiinta waxaa sharaf noo ah inaan soo bandhigno xeerarka aasaasiga ah oo aan aragno in wacyi u lahaanteeda, iyo ku intifaaceeda uu baraaruga Islaamka ku kaalmaynayo inay talaabooyin muhim ah horay ugu qaado, tan iyo inta ay ka xaqiijinayso natiijooyinka khayrka badan ee laga filayo, Alle idankii.

Waxaa xusid mudan in xeerarkani yihiin natiijo ka dhalatay dedaal, halgan, feker, dib u eegis, aqrin, iyo indho ku hayn socotay muddo dheer oo is daba jog ah aanu indhaha ku haynay khaladaadka, saxsanaanta ducaadda, waxaana xeerarkan kamid ah qaar markii ugu horaysay la qoray, iyo kuwa aan ka soo qaadanay macnihiisa ama ereyadiisa meelo kala duwan, kadib markii aan ku qanacnay.

## Ujeedooyinka Axdi Sharafeedka

Ujeedada Axdi sharafeedkan waa inuu jaangooyo koox xeerar ah oo aan rajaynayno in ay noqoto mid ay heshiis ku yihiin dhamaan dhinacyada kala duwan, ayna soo dhaweeyaan oo ay ixtiraamaan, haddii taasi ay suuro gasho waxaa ka dhalan kara guulo waaweyn oo ay ugu mhimsan tahay: in kalsooni iyo is jacayl laga dhex abuuro ducaadda dhexdooda, in la isu soo dhaweeyo hawlaha dacwadeed oo ay xukumaduhu wadaan iyo tan ay ducaaddu wadaan, in la yareeyo baaxadda khilaafka iyo khaladaadka, in sare loo qaado baaxadda waxyaabaha heshiiska lagu yahay iyo saxsanaanta, in la dhiirigeliyo dhaliisha wax dhista, lana ballaariyo xuduudaha fekerka iyo aragtiyaha, in laga baaraan dego dhinacyada hal abuurka iyo cusboonaysiinta, in la isugu kaalmeeyo waxa heshiiska lagu yahay, in la isu saamaxo waxa la isku khilaafsanyahay, iyo in laga baxo xayndaabka hawlgabnimada loona baxo xayndaabka firfircoonida iyo hawlkarnimada.

Haddii aan doono inaan soo koobno ahdaafta Axdigan waxa aan dhihi karnaa waa " Toosinta geedi socodka dacwada, iyo in la isu soo dhaweeyo ducaadda, iyo in la soo jeediyo talooyin cusub oo dacwada anfacaya", intaa kadibna Axdigan waxa uu ku wajahanyahay dhamaan dhinacyada, haseyeeshee waxa uu si gooni ah ugu wajahanyahay ducaadda oo ay tahay inay ka faa'iideystaan, ayaga ayaana ah inay Axdigan turxaan bixiyaan waxna ku daraan.

**Hiigsi Wanaagsan**

Axdigan wuxuu higsanayaa inuu noqdo "warqad shaqo" oo laga soo qalin daartay Qu'raanka kariimka iyo sunnada daahirka ah, kaasoo ka fog xadgudub iyo gaboodfal, una taagan dhexdhexaadnimo iyo toosnaan, mana sito midab xisbi oo gooni ah, isbahaysi gooni ah, koox gaar ah, dugsi dacwadeed, ra'yi fiqhi ah, taageero gobol gooni ah, umana ololaynayo mid kamida ah dhinacyada aan soo sheegnay, kamana hor imanayo, sharafteedana meel ugama dhacayo.

Sidoo kale Axdigan waxa uu ku higsanayaa inuu noqdo dastuur fekradeed, mid akhlaaqiyeed, mid tarbiyadeed camali ah oo ay ku intifaacaan ducaadda, iyo isbahaysi lamid ah kii " xilfi fadhuul", kaasoo ay saldhig ka dhigtaan, oo ay go'aansadaan inay ku hawlgalaan, iyo ku biirin macno gaar ah leh oo aan la mid ahayn kuwa caadiga ah, taasoo la garab dhigo kuwa iyada la midka ah ee wax tarka ah.

Axdigan waxa uu hiigsigiisu yahay inuu u grarab siiyo arrimaha soo socda:

1- Islaamka inuu yahay wadada kaliya ee ay ku jirto liibaanta adduunyada iyo tan aakhirada.

2- Ummadda aan ku abtirsano, oo aan ku faanayno sharafna ku leenahay ku abtirsigeeda

3- Hawsha dacwada ee ah hawsha ugu sharafta badan ee la qabto, taasoo ah hawshii ay qaban jireen Nabiyadii iyo Rusushii Alle.

4- Wadanka oo hooy u ah diinta, luqada, hiddaha, dadka, tagtadeena, xaadirkeena iyo timaadadeena.

5- Jiilalka soo socda ee ducaadda ah, si ay u noqdaan kuwa toosan oo ka fog gefafka, Axdigu waxa uu ku dedaalayaa in uu noqdo mid ay ku dheehan tahay xog-ogaalnimo, mawduuciyad, hufnaan, dhexdhexaadnimo, cad-cadaan, hab cilmi oo miisaaman, usluub sare, af dhawrsoon, iyadoo qofka aqrinayo uu dareemayo in Axdigan cidda ka dambaysa ay tahay mid ku tilmaaman kheyr, indheer garadnimo, laab furnaan, iyo jacayl run ah oo ay u qabaan dacwada Islaamka.

**Intaa kadib:**

Waxaa la rajaynayaa in Axdigan uu noqdo iftiin wax haga oo kulmiya ducaadda, heshiisna ay ku yihiin, iyaga oo iskood u doortay si sharf iyo run ay ku dheehan tahay, halkan ayuuna ka yimid magaca “ Axdi Sharafeedka Dacwada”, sababta oo ah kulanka lagu kulmo Axdigan waa mid ugu dambaynta ku yimid ku qancitaan madax banaan, u hogaansanaan aan qasab ahayn, doonitaan sharaf leh, kalsooni xeel dheer, iyo jeclaysi macnaha uu xambaarsan yahay Axdiga.

Waxaa sidoo kale la rajaynayaa in Axdigan noqdo mid ducaadda kartida iyo hamiga dacwadeed leh ay si dhab ah u daraaseeyaan, si ay uga faa’iideystaan waxyaabaha toosan ee uu xambaarsan yahay, talana uga bixiyaan khaladaadka ku jira, ayna soo jeediyaan xeerar cusub oo lagu biiriyo, si ay daabcadaha soo socda u noqdaan kuwa ka wanaagsan daabcadihii iyada ka horeeyay.

Allahayoow na waafaji wixii ku raalli gelinaya, kheyrka kuwa ka shaqeeyana naga dhig, naguna arsuq niyad khaalis ah oo ay toosnaani la

socoto, Alloow adiga ayaa mahad leh tan iyo inta aad ka raalli noqoto, oo adiga ayaa mahad leh marka aad raalli noqoto, oo adiga ayaa mahad leh raali ahaanshaha ka dib. Nabadgelyada Alle ha ahaato Sayyidkeena Muxamed dushiisa, ahalkiisa iyo asxaabtiisa, dhamaantood Alle ha nabad yeelo.

Hisham al-Dalib

1430H

## Saldhigyada Axdiga

### 1- Tawxiid Dhamaystiran

Waxa aan rumaysanahay Alle (CW), iyo inuu yahay Allaha kawnka abuuray, oo u taliya, inuu kaligii yahay midka xaqa lagu caabudo, kaasoo ku tilmaaman dhamaan timaamaha weyninka, dhamaystirnaanta iyo quruxda, kaaso ka hufan wax kasta oo nuqsaan ah, waanu jeclnahay, oo keli yeelnaa, weynaynaa, ka cabsanaa, waxna ka rajaynaa. Waxaan ugu yeeraynaa muslimiinta guud ahaan iyo gaar ahaan ducaadda inay arrinta caqiidada siiyaan – haddii ay ahaan lahayd dhanka; fahamka, rumaysashada, dareenka, iyo ku dhaqankaba mudnaan gaar ah oo aysan helaynin arrin kale, iyada ayaa ah asalka koowaad ee ugu weyn dhamaan arrimaha diinta haddii ay usuul ahaan lahayd iyo haddii ay furuuc ahaan lahaydba, waa asalka wehelka u ah qadiyad kasta, goob kasta, iyo goor kasta, sida ay wehelka ugu tahay nolosha muslimka ee dhinanac walba. Caqiidadu ma aha cutub kamid ah buug uu qofka muslimka ahi aqrinayo kadibna uu isku laabayo, si uu ugu gudbo cutub kale, haseyeeshe waa cutubka koowaad ee qofka muslimka ahi aqrinayo, wehelkana u ah had iyo jeer marka uu aqrinayo cutubyada kale. Caqiido waa xaalad fekradeed, mid qalbi iyo mid dhaqan oo aan ka harin qofka muslimka ah, waxayna xukuntaa noloshiisa tan iyo inta uu ka geeriyoonayo, arrinkanina waxyaabaha uu lama huraan ka dhigayo waxaa kamida in muslimku aqoon xeel dheer oo dhamaystiran uu u yeesho waxyaabaha ay caqiidaduna ku dhisantahay oo ay ugu horeyso: kelinimada Alle, cibaadada oo loo keli yeelo, axkaamtiisa oo la fuliyo, sidoo kale waxaa lama huraan ah in uu aqoon u yeesho waxyaabaha caqiidada buriya oo qofka diinta ka saari kara si dhamaystiran ama qeyb ahaan, waxyaabaha aad loola yaabo waxaa kamida in caruurta Islaamku xafidaan waxyaabaha weysada buriya, hase yeeshee aanay xafidin

waxyaabaha caqiidada buriya, labdubana waa kuwo loo baahan yahay, inkastoo farqi weyn oo xagga ahmiyadda ah uu u dhexeeyo.

Dhanka kale waxaa muhim ah inaan ka digtoonaano in qadiyadda tawxiidku ay noqoto mid ku kooban in dusha laga xafido oo keliya, iyadoo dadka xifdisan ay u haystaan inay yihiin kuwa hanuun ku sugan keligood, kadibna ay noqdaan kuwa isla weyn, is qaad qaada, dadka kalana ula dhaqma si ad-adayg iyo isla weynin ku jiro. In kalsooni lagu qabo xaqa aad haysato waa arrin loo baahan yahay oo wanaagsan, haseyeeshee waxaa loo baahan yahay in ay la socoto caadifaad wanaagsan oo loo hayo dadka kale, sidaa ayeeyna ducaaddu waxa ay ku noqonayaan kuwa la jecel yahay oo aan dadka kala didinin, kuwa naxariis badan oo aan qalbi adkayn, tawxiidkuna waxa uu noloshooda u noqonayaa mid leh muuqaal wanaagsan dhanka caqliga, damiirka, iyo dhaqanakba.

### 2- Islaamku waa Diinta Alle

Waxaan rumaysanahay in Islaamku yahay diinta Alle (CW), ee waaraysa, ee la xafiday, oo saxda ah, ahna midda diimaha gunaanadka u ah, agtayadana waxa uu ka yahay: qadiyad, hayb, xal, tagtadeenii, xaadirkeena iyo mustaqbalkeena, waa wadada liibaanta addunyada iyo midda aakhiro, hannaanka nolosha ee uu Alle noo dooray, oo aan rumaysanahay, sharaf iyo cizzi ku leenahay, aawadii ayaan jihaadna, wax kasta oo qaali ah oo agtayada qiime ku lehna waa ku gadanaynaa.

### 3- U Laabashada Masaadirta Asalka ah

Maadaama aan nahay kuwa kheyrka la jecel dhamaan dadka dunida, nalaguna kallifay inaan diinta ugu yeerno, waxaan ugu yeeraynaa inay Islaamka ka bartaan masaadartiisa asalka ah iyaga oo qalbi furan, caqli cadaalad wax ku eegayana wata, kuna kalsoon inay ka heli doonaan hanuun ay kaga baxaan baadida, iyo xaq ay kaga gudbaan baadilka, iyo

nabad ka badbaadisa cabsida, iyo deganaasho ka saarta walbahaarka, iyo caafimaad cudurka ka saara, ayaga oo ka heli doona xal kasta oo ay kaga hortagaan mashaakilka soo waajaha, iyo jawaabo ka shaafiya su'aalaha ay qabaan.

### 4- Baaqii ugu Horeeyay ee Xuquuqul Insaanka

Waxaan rumaysanahay in Islaamku yahay baaqii ugu horeeyay ee xuquuqul Insaanka, waa diinka insaanka siinaysa xuquuqdiisa oo dhamaystiran, sida xoriyadda caqiidada, karaamada ban'iiaadamka, xaqa waxbarashada, guurka, nabadda, shaqada, cadaaladda, wax lahaanshaha, iwm. Saldhiga uu Islaamku ka amba qaadayana waa sarreysiinta qiimaha Insaanka, oo ah midka ugu karaamada badan inta Alle uu abuuray, iyo wakiilkiisa dunidan, wax kasta oo dunida saaray ay yihiin kuwa loo fududeeyay in uu adeegsado Insaanka.

### 5- Aadanuhu waa Qoys Keliya

Waxaan rumaysanahay in bulshada caalamku tahay qoys keliya, oo ay kulmisay walaaltinimada Insaaniyadda, ayna yihiin makhluuq Alle abuuray, aabahoodna uu yahay Aadam, hooyadoodna Xaawa, oo laga abuuray carrada, dibna ay ugu noqonayaan, sidaa darteed waxaan ugu baaqaynaa muslimiinta iyo kuwa aan muslimiinta ahaynba inay yeeshaaan iskaashi kaasoo faa'iido u ah dhamaantood, waxyaabaha ay iska kaashanayaan waxaa kamida: xaqiijinta nabadda, faafinta xoriyadaha, u saldhigidda cadaaladda, la dagaalanka dambiyada, faafinta cilmiga, daryeelka dhallaanka, u kaalmeynta dadka waayeelka ah, deris wanaagga, dhawrista bii'ada, ixtiraamka heshiisyada iyo axdiyada caalamiga ah.

## 6- Dhawrista Qoyska

Guurka lamaanaha dheddiga iyo labka ayaa ah midka keliya ee sharciga ah ee uu qoysku ka askumo, qoyskuna waa goobta uga horaysa uguna muhiimsan ee barbaarinta iyo waxbaristu ka soo bilaabato, waana aasaaska ugu weyn ee ummadda, iyo gogosha dabiiciga ee fidriga ah ee dhallaanka iyo da' yarta soo koraysa, cidda mas'uulka ka ah hogaaminta qoyskuna waa aabaha iyo hooyada oo wadajira, sidaa darteed waxaan ku baaqaynaa in la dhawro, la ilaaliyo, sarena loo qaado qiimaha qoyska, loona diyaariyo wax kasta oo qeyb ka qaadanaya sidii qoysaska horumar iyo guul ku gaari lahaayeen, si xoog bandanna looga hor tago dedaalada badan ee is daba joogga ah ee ku hawlan baab'inta qoyska iyo hoos u dhigista qiimihiisa.

## 7- Xil Isku Wareejin Nabadeed

Waxaa haboon in ducaaddu isla meel dhigaan qaab xikmadaysan, cad, oo go'an, oo ay u hogaansamaan, kaasoo u suuro geliya in ay xilalka ay ka hayaan hay'adahooda dacwadeed ay isugu wareejiyaan qaab sahlan oo ay raalli isaga yihiin, oo ku salaysan nabad iyo kalgacayl, arrinkaasina waxa uu ka hor istaagaya in qolo gaar ah ay talada la keli noqoto, oo si gaar ah u haysato, ama ay dusha ka maamusho, wuxuuna yaraynayaa burburka iyo fitnada, waxa uuna meesha ka saarayaa fadhiidnimada iyo hawlgabka, wuxuuna fursad siinayaa hal abuurka iyo cusboonaysiinta, wuxuuna kordhinayaa baaxadda wada xiriirka iyo isku xirnaasha jiilalka kala duwan, wuxuuna ku kaalmaynayaa diyaarinta iyo carbinta tiro aad u badan inay noqdaan hogaamiyayaal, wuxuuna xoojinyaa wada shaqaynta koox ahaaneed, iyo in la ixtiraamo shaqada wadajirka ah oo u qaabaysan qaab mu'asaso.

## 8- Xeerka Almanaar

Waxaan jecelnahay kheyrka, walaaltinimada, iyo iskaashiga dhamaan dhinacyada, waxaan u cudurdaarnaa dadka aan kala aragti duwanahay, annaga oo raacayna xeerka caanka ah ee Almanaar oo uu hal abuurkiisu lahaa Sheekh Maxamed Rashiid Ridha (AHUN): “Waxaanu iska kaalmaysanaynaa wixii aan ku heshiino, waxaanan iskugu cudurdaaraynaa wixii aan isku khilaafno”.

## 9- Wadatashi

Waxaan ku baaqaynaa wadatashi, waxaanan dhiirigelinaynaa in la yeesho feker iyo hal abuur, lana ixtiraamo ra’yiga dadka kale haddii aad is waafaqdaan iyo haddii aydan is waafaqin intaba, qof kasta waxa aan u ogolnahay inuu fekero, ra’yigiisana dhiibto, iyada oo ay tahay in dhamaan loo hogaansamo go’aanka la qaato, haddii aanu go’aanku ahayn mid khilaafsan mabaad’iida guud ee cad-cad ee shareecada Islaamka. Si uu go’aanku u noqdo mid sax ah ama saxnimada u dhaw waa in cidda qaadanaysa ay tahay marjaca hawshaas saldhigga u ah oo keliya, taasina waxa ay lama huraan ka dhigaysaa in marjacaasu ay u dhamaystiran tahay xogta loo baahan yahay oo dhan, iyo in doodaha go’aanka lagu qaadanyo ay noqdaan kuwa dhabnimo iyo run ku salaysan, mawduuci ah oo la aamino karo.

## 10- **Marjaciyad Qura**

Waxaa loo baahanyahay in laga digtoonaado in hawsha dacwadu ay yeelato labo marjaciyadood, mid muuqata oo loo jeedo, kaalinteeduna ay tahay muuqaal guud iyo in dadka la horgeeyo oo keliya, iyo mid dahsoon, kaalinteeduna tahay midda sida dhabta ah wax u fulisa ee amarada siisa midda muuqata, marjaciyadda muuqata shaqadeedu waa inay wax jisho, midda dahsoona waa inay wax fuliso. Midda dahsoon ayaa qaadata go’aamada, oo wax u meerisa midda muuqata, si ay u

qaadato go’anka ay doonayso midda dahsoon. Arrinkaasi waa been abuur si cad uga hor imanaya mabaad’iida guud ee dacwada, gaar ahaan mabda’a wada tashiga, isaga oo sharciyaynya go’aamo aan sharci ahayn, waana keli talisnimo cad, keli talisnimada iyo amar ku taaglaynta arrimaha diinta ayaa ka xun oo ka daran midda dhanka arrimaha adduunyada, sababtoo ah waxa ay shaati diimeed been ah u gelinaysaa wixii ay doonto. Dhaqankan foosha xuna waxa uu ka dhigaya marjaciyadda dahsoon mid isla weyn oo ku jees-jeesta marjaciyada muuqata, marjaciyada muuqatana waxa ay midda dahsoon u qaadaysaa cadaawad iyo cuqdad, waxayna ahaanaysaa mid had iyo jeer gaadmo ugu jirta, goor kastana marjaciyadda muuqata waxa ay ahaanaysaa mid taag daran oo taageerayaasheedu u arkaan mid aan isku kalsoonayn, arrimahaasina waxa ay abuurayaan cadaawad iyo xaasidnimo dhaliya guul-darro iyo lug-gooyo. Ururadii dacwadeed ee yeeshay hogaanka noocan ah ee isku dhafan waxa ay la kulmeen dhibaatooyin qaraar, waxa ayna bixiyeen qiimo qaali ah.

11- **Hawsha Hay’adaysan**

Waxaan aaminsanahy hawsha wadajirka ah ee qaabaysan oo ku salaysan hay’ad ama mu’sasad, taasoo ixtiraamaysa ugu horayntaba akhlaaqda Islaamka, marka labaadna u hogaansamaysa nidaamka iyo xeerarka hay’adda, sababtoo ah waxaannu si yaqiin ah u aaminsannahay in hawsha noocan ah ay nafci badan u leedahay ummadda, kana dheertahay xagga waqtiga midda qofka keligii uu wado, iyo sidoo kale in dib u eegista shaqada wadareed, turxaan bixinteeda, toosinteeda, iyo cusboonaysiinteeda ay tahay mid kaga haboon tan qofka keligii wado, intaa kadibna shaqada wadareed ma aha mid ku xiran dadka wada oo ah kuwa tegaya, ee shaqadu waxa ay ahaanaysaa mid socota inta ay hay’addu jirto.

12- **Koox Ahaanta**

Waxaan ku dedaalaynaa inaan dhidibada u aasno koox ahaanta iyo wadajirka ka dhexeeya dadka wada shaqaynaya, iyo xoojinta qiimaha mabda'n uu ku leeyahay agtooda, waxaana kamid ah sida lagu gaari karo in la qaddariyo dadka khibradda leh, lana dhiiri geliyo isku xirnaanta jiilalka kala duwan, halkaasoo lagaga faa'iideysanayo xikmadda odayaasha iyo xamaasadda dhalinyarada, iyo in danta guud laga hormariyo midda gaarka ah, iyo in lagu heshiiyo waddooyin xadaari ah, oo sharci ah, oo lagaga hortago mashaakilka laguna xaliyo khilaafaadka inta aysan dhicin ka hor, iyo in waddada ugu wanaagsan lagu xalliyo kadib marka ay dhacaan, iyo in la faafiyo dhaqanka ah in si cadaalad ah loo maamulo dhaqaalaha iyo xilalka hay'adda.

13- **Daryeelka Hal-abuurka**

Waxaan aaminsanahay in xoogga la saaro daryeelka ardayda leh hal-abuurka iyo kartida maskaxeed, kuwaasoo noqon doona dadka hogaamiya cusboonaysiinta, hormarinta, iyo ka fekerka xalalka faa'iidada leh ee aan baadi goobayno, iyo hal-abuurka loo baahan yahay mustaqblka.

14- **Tusaale ku Dayasho Mudan**

Waxaa loo baahanyahay in hay'ad kasta oo dacwadeed ay lahaato mabaadi', manaahij, qorshooyin, iyo akhlaaqda hawl-wadeenka, kaasoo tusaale wanaagsan u noqon kara hawl dacwadeed oo xikmad ku dhisan oo guuleysta, taasoo marka ay arkaan dadka kale ay jeclaystaan ayna ku dedaalaan sidii ay ugu dayan lahaayeen.

15- **Cusboonaysiin Aragti ku Dhisan**

Waxaan rumaysanahay ahmiyadda ay leedahay cusboonaysiinta joogtada ah, iyada oo la ixtiraamayo shaldhigyada diineed ee lama

taabtaanka ah, sidaa ayaana waxaa ku hirgelaya mabda' kulminta waxyaabihii soo jireenka ahaa ee wanaagsan, iyo waxyaabaha cusub ee anfaca leh, waxaana sidaa suurogal ku noqonaya ka faa'iideysiga casriga aan joogno iyo ka warhaynta qaddiyadihiisa jira, taasoo awood noo siinaysa firfircooni naga ilaalisa hawlgab, fadhiidnimo, iyo go'doon.

16-**Isku Filnaasho**

Waxaan ku baaqaynaa in la gaaro isku filnaasho, iyo ku tiirsanaan awoodaha gaarka aan u leenahay intii suurogal ah, sababta oo ah deeqaha la helo ma aha kuwa joogto ah, oo helitaankoodu damaanad leeyahay, waddada ugu wanaagsan oo heerkaa lagu gaari karana waa aasaaska hay'ado waqafeed oo maalgeliya hawlaha dacwada kuwaasoo la jaanqaadi kara awoodda iyo duruufta jirta.

17- **Dhexdhexaadnimada Sunooyinka Alle**

Sunooyinka Alle (CW) – tanina waxa ay kamid tahay cadaaladda iyo naxariista Alle- waa kuwa dhexdhexaad ah oo aan qof, koox, ama diin u xaglinaynin, halka qof, koox, ama diin kalana aanay cadaw ku ahayn, balse waxa ay masaafo siman u jirtaa dhamaan dhinacyada, ciddii si fiican ula falgasha guul ayeey ka gaartaa, cidii la falgali weydana guul-darro. Taa macnaheedu waa in Alle (CW) uusan qof ama koox aanu siinayn guul aanay doonin oo aysan dedaal ku bixin, haddey doonaan muslimiinba ha ahaadaane, sidaa darteed waxaa lagama maarmaan ah in asbaabta guusha lala yimaado.

18- **Baashaalka loo Baahanyahay**

Baashaalka – aan xuduudiisa banaan la dhaafinin – waxaa uu kamid yahay waxyaabaha ugu muhiimsan ee xoojiya xiriirka da' yartu la leeyihiin ururkooda, taasoo ka dhigaysa kuwa aad u daneeya ururka, ikhlaas u haya, afkaartiisana aad uga bogta, sidaa darteed waxaan ku

baaqaynaa in la adeegsado baashaalka munaasabadaha kala duwan, sida ciidaha, furitaanka iskuulada, iyo xiritaankooda, waana in isaga dartii loo sameeyo xaflado, nashiidooyin, tartamo aqooneed, cayaaro isboortis ah, dadka ku guulaystana la siiyo hadiyado iyo abaalmarino, …iwm.

## 19- **Ujeedooyinka iyo Wadooyinka lagu Gaaro**

Ujeedooyinka aasaasiga ah waa kuwa sugan, kuwa furuucda ahna waa kuwa xilli ku eg, wadooyinka lagu gaarayase waa in ay noqdaan kuwa la cusboonaysiiyo markasta, isbadali kara oo la hormarin karo, waxaana loo baahanyahay had iyo jeer in la bedbedelo, noocyo kala duwanna loo adegsado, lana hormariyo  sii joogto ah, iyo in laga soo qalin daarto khibradaha kale ee ay gaareen dadka muslimiinta ah iyo kuwa aan muslimiinta ahayn, sababtoo ah xikmaddu waa baadida qofka mu’minka ah, intaa kadibna waddo kasta oo loo adeegsado dacwadda waa in laga helo labo arrimood: ta koowaad waa in ay jirto baahi dhab ah oo loo qabo inta aan la askumin, ta labaadna waa in wanaageedu ka badan yahay xumaanteeda, marka la askumo kadib, haddii kale ma noqonayso mid uu banaanyahay isticmaalkeeda.

## **20- Islamka iyo Hawsha Islaamiga**

Waxaa lama huraan ah in la kala saaro diinta islaamka iyo hawlaha dacwada, Islaamku waa diinta Alle oo saxda ah, oo waaraysa, oo baadilku aanu iman karin horteeda iyo gaadeesheeda, hawsha dacwaduna waa dadaal bini’aadam oo sax iyo khaladba yeelan kara, diinta Alle waa muqadas,  balse hawsha diinta darteed loo qabanayo ma aha  muqadas, xurmada  uu Islamku leeyahana kama dhigayso camalka islaamiga ah mid muqadas ah oo macsuum ah, khaladaadka hawlaha islaamiga ahna kama dhigayso Islamka mid aanan dhamaystirneen.

## 21- Manhajka ugu Fiican

Manhajka ugu haboon ee dacwada Islaamaka waa in si qoto dheer, cad oo dhamaystiran loo qeexo xaqiiqada Islaamka iyo manhajkiisa, sidaas ayaana ugu haboon in ay dacwadu ku saldhigto maanka qofka loogu yeerayo iyo qalbigiisa, taas ayaana rajo fiicani ku jirtaa inuu qofku aqbalo dacwada. Sidaa darteed waxaa nala gudboon inaan ka fogaanno inaan ka bilawno soo bandhigista shubahaatka iyo ka jawaabistooda, ama aan ka sheekayno kooxo, fikrido iyo dedaalo cilmiyeed oo waqti hore jiri jiray, kuwaasoo la tagay wanaag iyo xumaan wixii ay lahaayeen, balse haddii ay dantu ka fursan weydo waa in la jalleeco oo la siiyo waqti aad u kooban, isla markaana aysan dhibaato u gaysan asalka manhajka.

## 22- Doodda oo laga Fogaado

Waxaan ku baaqaynaa in la xiro albaabka su'aalah nadariga ah, doodaha mala awaalka ah, oraahyaha qaacidada ka baxsan "shaadka", dedaalada cilmiyeed ee laga guuray, waxyaabaha malo ahaan dhici kara, iyo doodaha ma dhalayska ah, maxaa yeelay intaa oo dhan waxay lumiyaan waqtiga, waxqabadka iyo hantida, waxayna keentaa in laga cararo masuuliydda dhabta ah oo ay tahay in loo istaago, sida badanna waxa ay keentaa is nacyeb iyo kalatag, mararka qaar gaara heer xaasidnimo iyo xiqdi.

## 23- Xiriirka ka Dhaxeeya Hay'adaha Islaamiga

Asal ahaan wadashaqaynta u dhaxeeysa ururada Islaamka waa is-dhamaystir, hadii lawaayo taa, midda labaad waa iskaashi, hadii lawaayo tan saddexaad waa is-ixtiraam iyo wada-noolaasho, wixii intaa ka soo haray waa bubur.

**24- Muhimada isla Xisaabtanka**

Mabda' isla xisaabtanka waa mabda' Islaami ah oo qoto dheer, waana dhaqan ilbaxnimo oo sareeya, sidaa daraadeed waxaa haboon inaan ku dedaalno ku dhaqankiisa, iyada oo la adeegsanayo in wax walba la caddeeyo oo daaha laga rogo, la is dhaliilo, dib u eegis iyo isa sixid joogto ahna la isku sameeyo, si aan u ogaano dhinacyada wanaagsan oo aan u ilaashano, una kordhino, oo aan u ogaano dhinacada xun oo aan ka digtoonaano waxna ka qabano, maxaa yeelay hawsha bini'aadamku sax iyo khaldba way noqon kartaa.

25- **Ixtiraamka Takhasuska**

Waxaa haboon in aan waydiino arrimaha la xiriira shareecda culimada ku takhasusay, arrimaha farsamada in aan weydiino khubarada ku xeeldheer, waxaa suurogal ah in qof dadka kamida ah uu yahay daaci karti leh oo magic iyo meeqaan leh laakiin aanu noqon Karin caalim mufti ah oo ka jawaaba mas'alooyinka diiniga ah, isla markaana aanu leyn aqoon farsamo oo gaar ah.

**26- Wanaag u Janjeer**

Waxaan ku baaqaynaa in xoogga la saaro dhinacayada suuban, sama-filashada, bishaaraynta iyo fududaynta, iyo in laga fogaado dhinacyada xun, xumaan-filashada, didinta dadka, iyo culays ka dhigista arrimaha.

**27- Degganaasho loo Baahanyahay**

Waxaan ku baaqayna in balo abuurka iyo wax kicinta loo badalo xikmad, xasarad abuuritaankana daganaasho, dayacaadda arimaha noolashana in loo badalo farsamo aqooneed oo wax lagaga qabto, loogana qeyb qaato hormarinteeda.

## 28- Diin Dhamaystiran

Islaamku waa diinta ugu dambaysa diimaha Alle uu u soo dejiyay banii'aadamka, sidaa darteed waa manhaj dhamaystiran oo loogu talogalay inuu maareeyo arrimaha nolosha idilkeed, haddii ay ahaan lahayd qof, koox, dawlad. Islaamku waa Diin, Dawlad, Qaanuun, Cibaado, Dhaqaale, Akhlaaq, Caafimaad , Xiriir qoys, bulsho iyo mid dawladeed iyo wixii la halmaa. Islaamku waxa uu qofka u yahay wehel laga bilaabo marka uu dhasho, noolashiisa oo idil, geeridiisa ilaa iyo maalinta qarbiga laga soo bixinayo. Sidaa darteed dadka ducaada ah waxaa laga doonayaa in ay xoog saaraan mabda' dhamaystirnaanta Islaamka, kuna faanaan, ayna diidaan dedaalada ku aadan in Islaamka lagu soo koobo cibaadooyinka oo keliya, arrintaana waxa ay u baahan tahay in aanan ku maashoonin furuucda iyo qeybaha yaryar ee axkaamta shareecda, annaga oo dayacayna usuusha iyo tiirarka waaweyn ee shareecada, balse hadii ay ka fursan waydo in la qaadaa-dhigo arrin farac ah, waxaa waajib ah in ay ku timaado goobteeda, xiligeeda, duruufteeda, iyo culeyskeeda munaasibka ah oo keliya.

## 29- Anshaxa Wadahadalka

Waxaan ku baaqaynaa in la barto edebta wadahadalka iyo farsamooyinkiisa, maxaa yeelay wadahadalku waa mid kamida waddooyinka ugu haboon oo ay dacwadu ku guulaysato, qofka farsama-yaqaanka ah ee ku guulaysta hawshiisa wadahadalkana waa garyaqaan ku guulaystay qadiyadda uu difaacyao, midka aan lahayn farsamo guusha ku hogaamisana waxa uu ku fashilaa qadiyadda uu difaacayo.

## 30- Waddo La Wadaago

Waxaan innaba suuragal ahayn inay ducaadu ahaadaan hal nooc oo kali ah dhanka hadafka, waddooyinka la adeegsanayo, iyo mudnaanta

hawlaha, markastana waxaa jira khilaaf ha waynaaado ama ha yaraado, balse haddii aad loogu fiirsado waxaa jira qodobo badan oo ay ka midaysan yihiin ducaaddu oo ay ka mid tahay caqiidada, cibaadooyinka, akhlaaqda, mucaamalaadka, hayeeshe khilaafka ayaa marar badan keena in la halmaamo waxyaabaha badan oo laga midaysan yahay, sababtuna waa khilaafka oo aad loo buunbuuniyo oo la toban jibbaaro, waxaase muhim ah in si cad loo muujiyo jiraataan waddo heshiis lagu yahay oo ay ducaaddu wadaagaan, taasoo ay waajib ku tahay dhamaan dhinacyada inay ogaadaan, ku farxaan, ku shaqeeyaan, ayna ka shaqeeyaan sidii ay ku ballaarin lahaayeen si deganaasho, sabar, hawlgal joogto ah ay ku dheehan tahay, si ay u kulmiso tirada ugu badan oo ducaad ah.

## 31- Khatarta Qarsoodinimada

Waxaan ka digaynaa arrimaha ta'wiilka, qarinta, iyo daah-saarka fikrada iyo hawlaha Islaamiga ah, waxaan hoosta ka xariiqaynaa in Islaamku yahay diin dhamaystiran oo wax walba cadaysay, dhamaan mabaadii'diisuna waa kuwa banaanka yaal oo aan qarsoodi ahayn, wax dheerad ahna aan lagu kordhin karin, in caqdiidadu tahay mid cad oo banaanka taal oo la wada garanayana waxa ay siisaa awood dheeraad ah, maxaa yeelay qofka bini'aadamka ah banaanka ayuu soo dhigaa waxa uu u arko inay sharaf tahay wuuna ku faanaa, dadkuna fidrad ahaan waxa ay raacaan fekradaha cad cad oo la fahmi karo oo toosan, waxayna fidrad ahaan ka didaan afkaarta dahsoon, qarsoodiga ah, isku dhex yaacsan, oo dhalan rogan, gefafka ku dhaca qarsoodigana waxa ay dhibaan dadka sameeya ka badan inta ay dhibaan dadka ka soo horjeeda, gefafkuna qarinta waa ay ku bataan, maadaama mugdiga dhexdiisa aan waxba lagu arag, taana waxaa ka duwan gefafka muuqda oo sida cad loo sameeyo taasoo isla markiiba wax laga qaban karo maadaama loo jeedo.

32- **Fekrad Mideysan**

Sababaha kala tagga iyo khilaafka ducaadda dhexdeeda ah keena waxaa kamid ah: Maqanaanshaaha xadka ugu hooseeya oo midnimo fekradeed ah oo u dhexeeya ducaadda, taasoo keentay, walina keenta kala duwanaanshaha ujeedooyinka, wadooyinka loo adeegsado dacwada, iyo mudnaanta hawlaha, taasoo ay sii dheertahay kala didka, nacaybka iyo uur-xumada dhexdooda ah, sidaa darteed waxaa lama huraan ah in dhidibada loo aaso midnimo fekaradeed oo u dhexeysa guud ahaan ducaadda iyo gaar ahaan dhalinyarada, taasoo ku imanaysa faafinta aqoonta shareecada ee ku salaysan kitaabka iyo sunnada, dhaqamada ay kamid yihiin dhexdhexaadnimada, iskaashiga, is masaamaxa, walaaltinimada, xaq-soorista,u kala horumarinta arrimaha sida ay u kala mudan yihiin, farsamooyinka wadahadalka, edabta khilaafka, adkaynta in Islaamku yahay diin dhamaystiran, kuna haboon xilli kasta iyo goor kasta, waxaana arrimahaa gacan ka gaysan kara xulashada buugag si gaar ah loo doortay oo si habsami ah ugu adeegaya ujeedada, taasoo la siinayo ducaadda iyo dhalinyarada, iyadoo markasta dib u eegis lagu samaynayo, sida ay sameeyaan qeybaha u xilsaaran manaahijta iyo duruusta ee dugsiayada waxbarashada ee hoos taga wasaaradaha waxbarashada iyo barbaarinta.

**33- Xushmayn aan Xadka ka Baxsanayn**

Waxaa dabiici ah ama caadi ah in la doonana ay wanaagsan tahay in qofka muslimka ah u jecalaado hogaamiyihiisa xagga dacwadda, ama sheekhiisa cilmiga ugu sheekha ah, ama imaamkiisa masjidka, iyo wixii la mid ah, balse jaceylkaas waxaa haboon inuusan dhaafin xadkiisa, dadkii haystay diimihii hore waxa ay lumeen markii ay ku xadgudbeen weynaynta nabiyadooda iyo dadkooda saalixiinta ah, oo ay siiyeen hogaansankii ay ahayd in la siiyo Alle, kadibna ay hawshoodu ku idlaatay shirki, kadib markii ay ahaayeen kuwa ahlu tawxiid ah. Waxaa

kamid ah cudarada ku faafay muslimiinta dhexdooda kuwooda caadiga ah iyo kuwooda ducaadda ahba inay ku xirnaadaan marjacyo ay leeyihiin si xagjirnimo ah, kaasoo ay ka dhigeen halbeeg lagu kala saaro xaqa iyi baadilka, saxa iyo khaladka, sidii iyaga oo macsuumiin ah, waxayna is halmaansiinayaan qaacida oranaysa “ Ragga waxa aan ku aqoonsanaa xaqa meesha ay ka taagan yihiin, xaqase kuma aqoonsano ragga wata ee sidiisa ayaan u raacnaa”, xadgudubkan lagu xadgudbayo jacaylka ashkhaasta ayaa ahaa welina ah sabab kamida sababaha kala geeyay muslimiinta, iyo in uur-xumadu ku faato ducaadda dhexdooda, xalka arrinkanina waxa uu ku jiraa in dadku jeclaadaan marjacooda si dhexdhexaysi ah, ayna u arkaan in ay yihiin banii’aadam waxna saxa waxna khalda, jacaylka, tixgelinta iyo u hogaansanaanta ay helayaan waxa ay u dhigantaa inta ay xaqa u jiraan iyo hawlaha ay qabtaan, muslimka waa xaq doon, marjacu waa waddo lagu gaaro hadafka oo tegaysa, fekraduse waa yoolka, baaqi ayeyna ahaanaysaa mar kasta.

## 34- Ka Bilaabista Meesha Ay Hawsha Gaarsiiyeen

Waxaan ku baaqaynaa in wax lagu dhiso tajribadii dadkii naga horeeyay, hay’adda, markazka, iskuulka, ama daaciga kama bilaabo hawsha meel maran oo aan looga horaynin, mana aha qofkii ugu horeeyay oo u istaaga u adeegidda diinta Alle, mana noqanayo qofkii ugu dambeeyay oo u istaaga arinkaan sharafta badan.

## 35- Sunnada Saanqaadka Isdabayaal

Waxaan ku baaqaynaa in dhidibadda loo aaso qiyamka hormarinta hawsha si tartiib tartiib ah, iyada oo laga fogaanayo ku soo boodada iyo durduriska, sare u qaadida kororka hawsha oo aan qardo jeex ahayn, saan qaad isdabayaal oo aan boodaalaysi ahayn, degnaansho aan deg deg ahayn, shaqo dagan oo joogto ah, oo aan degdeg kala go’ go’an ahayn, xadiiskii sharafta badnaa ee rasuulkuna waxa uu leeyahay “ Ninka

guureeya dhulna ma goynin, duudna ma badbaadinin” xadiiska kalana waxa uu ku leeyhay “ Shaqada Alle agtiisa loogu jecelyahay waa midda joogtada ah haba yaraatee”, xadiis saddexaadna waxa uu leeyahay “ Diinta qofna kama faquuqmo, haddii ay dhacdana diinta ayaa adkaata”, waxaana loo baahan yahay inaan xasuusnaano xikmadda qaaliga ah ee oranaysa “ waqtigu waa qeyb kamida daawda”.

## 36- Muddeysnaan

Waxaan aaminsanahay in wax waliba muddo loo sameeyo; taaso ah in loo qaybiyo ahdaafta hawsha heerar iyo darajooyin u adeegaya danta guud, iyadoo midda koowaad ay u gogol xaarayso midda labaad, kan labaadna uu ku dul dhismayo kan koowaad, waana inaan soo bandhigno ujeedooyinka inta aan awoodno oo la jaan qaadi kara duruufta.

## 37- Hay’adaha Dedaal Cimiyeedka Wadareed

Waxaan si qoto dheer u rumaysannahay, hoostana uga xariiqaynaa si joogta ah, in Islamka yahay diin ku haboon goob kasta iyo goor kasta, uuna awoodo inuu xaliyo mushkiladaha soo cusboonaada had iyo jeer, waxaan ugu baaqaynaa culamada Islaamka iyo fuqahada inay soo bandhigaan xalka, waxaan soo dhawayneenyaa hay’adaha dedaal cilmiyeedka wadareed, oo ay kamid yihiin: majmaca cilmi barista Islaamka ee Masar, Majmac Fiqhiga Islaamka ee hoos taga Raabidada Caalamka Islaamka, Majmac Fiqhiga Islaamka ee Khartuum, Golaha Yurub ee Fatwada iyo Cilmibaarista, Golaha Fiqhiga Islamka ee Waqooyiga Ameerika, Midowga Caalamiga ah  ee Culamada Islaamka iyo kuwa la midka ah, waxaan u aragnaa in samayntoodu tahay tilaabo aad muhim u ah, waxaanan rajaynaynaa in hay’adahan barakaysan ay yeeshaan xiriir iyo wada shaqayn, xiriirkan oo ah mid kordhinaya faa’idada laga helayo waxqabadkooda, sidoo kale waxaan rajaynaynaa inay ku dhamaystiraan qeybaha farsamada ee maamulkooda dad khibrad

iyo takhasus u leh hawlahaa, taasina waxa ay usii kordhinaysaa kalsoonida iyo waxqabadka hay'adahaa.

## 38- Mid Kamida Kooxaha Islaamka

Waxaanu rumaysannahay in koox waliba, xisbi ama dhaqdhaqaaq dacwadeed ay yihiin koox ka mid ah muslimiinta, ee ma aha kooxda kaligeed muslimka ah, qiimaha ay koox kasta leedahayna waxa ay ku kasbanaysaa saxnaanta fekerkeeda, iyo waxqabadka ka dhasha hawlaheeda iyo sida ay u hirgaliso afkaarta ay rumaysantahay.

## 39- Khataraha Guud-yeelidda

Waxaa si aad ah ugu faafay oraahyo badan oo ay ducaaddu adeegsadaan ereyo dhibkooda leh oo si duuduub ah loo sheego, kuwaa oo ay kamid yihiin: awoodaha aan kuwa muslimiinta ahayn waxay ku midaysan yihiin la dagaalanka Islaamka, Yahuudana waa kuwa ku amar ku taagleeya caalamka, wax kastana maamula, sidii iyaga oo awooda wax walba inay sameeyaan, shaqo kasta oo dacwadeed oo ay dawladdu dhinac ka tahayna waa shirqool, dhagar, dabin iyo dhibaato ay tahay in laga taxaddro. Shaqo kasta oo dacwadeed oo aanay xukuumaddu shaqo ku lahayna waa kheyr soocan, iyo saxnaan dhamaystiran, xaalka ummadda Islaamkuna sare ayuu u socdaa si joogta ah sida ay aaminsan yihiin koox ducaadda kamida, ama hoos ayuu si joogta ah ugu socdaa sida ay aaminsan yihiin koox kale, meel kastana dabin iyo shirqool ayaa Islaamka u yaal sida ay aaminsan yihiin koox kale, halka koox kale ay qabto inaanay jirin wax shirqool iyo dabin ah, fekerka noocan ah waxaa ka maqan xaq-fal, mawduuciyad, maangaabni iyo garasho yari ayuuna ku salaysan yahay, go'aamada uu gaarayna waa kuwa diyaarsan oo degdeg ah, dadka noocan ahna waxa ay saaxiibadood ka yarayaan culeyska kaga iman lahaa in la raadiyo xalal, hal abuur, iyo khiyaaraad kale oo ku salaysan cilmibaaris, waxa uuna dareensiinayaa inay yihiin

kuwa cudurdaar leh haddii ay fadhiidnimo iyo karti darro ku sifoobaan, sababtoo ah waxa ay iska dhaadhiciyeen amaba loo sheegay, ama had iyo jeer ay maanka ku hayaan inay hor taagaan yihiin dufaan xoogan oo ka imanaysa xoogaga sharka oo aysan iska caabiyi karin, fekerka noocan ahna waa mid khilaafsan sunnada Alle ee ku salaysan is riix-riixa. Waajibka qofka muslimka ah waa inuu ka fogaado oraahyadan duuduubka loo sheego ee dhibka leh iyo wixii la halmaala, waana inuu iftiimiyo nuurka caqligiisa iyo xamaasada qalbigiisa, si fiicanna arrimaha u qaadaa-dhigo, shay walbana uu dhigo makaankiisa, uuna dedaal ku bixiyo inuu fahmo shay kasta iyo sababta keentay, ciladaha iyo natiijooyinkooda, kala doorashada xalalka iyo halabuurkooda, iyo inuusan ku dhicin mala awaal, iyo ra'yiga ku dhisan inuu kala doorto laba arrimood oo keliya kuwaasoo iska soo horjeeda sida: Madaw iyo Caddan, Malaa'ig iyo Shayaadiin, Suurogal iyo wax aan suurogal ahayn, fudayd iyo culeys.

## 40- Masuuliyadda Saaran Bini'aadamka

Alle (CW) wuxuu ballan qaaday ilaalinta diintiisa iyo dhawrideeda, balse Alla oo - xikmadiisu sareeyso – muhimaddan weyninka badan waxa uu ku kalifay muslimiinta, diintaan inkasta oo ay tahay xaqa cad, qaddarta Alle waxa ay ku fushaa gacmaha banii'aadmka, dhamaanteenna waxaanu ogsoonahay inta ay la egtahay baaxadda hawlihii nafhurnimo ee ay qabteen Nabiyadii Alle (NNKHA) iyo ardaydoodii, iyo asxaabtoodii, iyo dadkii raacay waddadoodii, si ay ugu gargaaaraaan diintaan, iyaga aayaannu ku dayanaynaa, jidkooda ayaannu ku soconaynaa.

## 41- **Tusaale Wanaagsan**

Waxaa haboon in ducaaddu xasuusnaadaan in tusaale waanaagsan loo noqdo dadka inay tahay waddooyinka ugu muhimsan oo ay dacwadu

guul ku gaari karto, ducaadda muslimiinta ahna waxa ay ku guulaysteen inay Islaamka ku faafiyaan waddooyin kala duwan, oo ay ugu horeeyso in dadka loo noqdo tusaale wanaagasan, sidaa darteed waxa looga baahan yahay ugu horayntaba inay dadka ay u yeerayaan ay u noqdaan tusaale wanaagsan oo ku dhaqma waxa ay dadka ugu yeeryaan.

## 42- **Eray-Bixinno Xeeldheer**

Waxaa haboon in aan ku dadaaalno inaanu leenahay erey-bixino gaar noo ah, kuwaa oo ah kuwa xeeldheer, cad-cad, oo madaxbanaan, laguna doortay si xikmad iyo farsamo ay ku jirto, iyadoo laga fogaanayo in si indho la'aan ah loo raaco mawjadaha fikradeed ee baaha oo dunida ku faafa markii in muddo ahba la joogo, waana in aanan ku tilmaamin Islaamka in uu yahay Hantiwadaag marka fikirkani leeyahay suuq, ama Hantigoosi marka fikarkani suuq leeyahay, ama dimuquraadiyad marka ay suuq leedahay, Islaamku waa Islaam, waxa uu leeyhay halbeegyadiisa, saldhigyadiisa qotoma oo aan is badalin, bar-bilawgiisa iyo bar-dhamaadkiisa, in mabaad'iida Islaamka qaarkeed ay isu ekaadaan ama isu dhawaadaan fikrado kale sababteedu waa Islaamka oo ah mid dhamaystiran koobayna wax walba, taasina nooma samaxayso in aan Islaamka ku tilmaano mawjadaha fekradeed ee kala duwan, sababtoo ah isaga ayaa ah asalka, wax ka soo harayna waa farac, asaga ayaa ah midka sugan, wax ka soo harayna wey is bed-bedelaan, isaga ayaa ah xaq soocan, sidaasina waxa uu uga duwanyahay mabaadii'da kale oo si kala heer ah xaqa ugu dhaw ama fog.

## 43- **Qoraallo Cad-cad**

Waxaa haboon in qoraalada dacwadu ay ahaadaan kuwa cad-cad, oo laga baaran dagay, aadna looga shaqeeyay, tasoo keenaysa inay yeeshaan macno keliya, kaasoo ka soo gudbaya qoraaga una soo gudbaya qofka aqrinaya, fahamkuna uu noqonayo mid keli ah labada

dhinacba, arrinkaana waxaa ku jira labo faa'iido; tan hore waa: in la mideeyo fahamka iyo dhaqanka ducaadda, tan labaadna waa in la baabi'iyo jahwareerka iyo isku dhex yaaca ducaadda dhexdooda ah, gaar ahaan ducaada dhalinyarada ah, lagana reebo fasiraadaha aan saxda ahayn oo keenaya hadallo dhibaatooyin keena, oo dhaliya dedaalo cilmiyeed is burinaya, xadgudub iyo gaabis, fitnooyin iyo kala qaybsanaan.

## 44- **Soo Dhaweynta Dhinaca Kale**

Maabaadii'deena ma aha kuwa aan annagu leenahay, ee iyada ayaa na leh, marka waxaa haboon in aanan ka caroonin dedaalada dadka kale ee u shaqaynaya mabaadi'daas, si kasta oo ay u kala duwanaato usluubka iyo nooca shaqada ay hayaan iyo kan aan annagu hayno, waxaana waajib ah in aan ku faraxno, maxaa yeelay dadaalkooda iyo keennaba waxa ay ku wajahan yihiin adeega howlaha dacwada Islaamka. Waxaana waajib nagu ah inaan jeclaano, bogaadinana dedaladooda, lana talino, oo aan iskaashanno intii suuragal ah, waana inaan ka faa'iidaysanno dadaal kasto oo wax ku ool ah oo samaynayso koox ama shakhsi, haba yaraado dadaalku, ama khalad iyo gaabis ha lahaado.

## 45- **Xubinnimo is Dhamaystiraysa**

Waxaa haboon in ducaadu ay ku dadaalaan badbaadinta dalka, aminigiisa, waxqabadkiisa, deegaankiisa iyo mustaqbalka jiilashiisa soo socda; maxaayeelay xiriirka ka dhaxeey ka tirsanaanshaha qaran, qoomiyad, iyo doorashadaada inaad rumayso diin ama mabda' waa xiriir is dhamaystiraya oo isla jaan qaadaaya, ee ma aha xiriir is burinaya ama iska hor imaanaya.

46- **Keligeen Sax ma Nihin**

Waxaan caaddaynaynaa oo aan hoosta ka xariiqaynaa si cad oo go’an in aanan anagu ahayn kuwa keligood sax ah, waxaanna ugu digaynaa dadka kalana in ay arinkaa ku dhacaan, waxaanu rumaysannahay ahdaafteenna iyo waddooyinka aan ku gaarayno, balse sheegan mayno inay dhamaystirantahay, waxaanan soo dhawaynaynaa anagoo u mahad celinayna cid walba oo na tusta khaldaadka iyo gaabiska aanu leenahay, sidoo kale waxaan ixtiraamaynaa xulashada dadka kale ee ku aadan ahdaaftooda iyo waddooyinkii ay u mari lahaayeen, waxaa nalaga doonayaa dhamaanteen inaan niyada u barax-tirno Alle (CW), aanan ku dedaalno sidii aan wixii sax ah ku gaari lahayn, anagoo la imanayna geesinimo aan ku qaadano wadada cusboonaysiinta, waxaanan qiraynaa khaladaadka naga dhaca, waxaanan ku farxaynaa waxyaabaha saxda ah ee ay qabtaan dhinacyada kale hadii uu ka soo yeero cid kale, taana waxaa ka dhalanaya  in aan khibradaha kala faa’iidaysano, arinkaasina waa mid aad muhiim ugu ah kobcinta macluumaadka daaciga, iyo hay’adda uu ka tirsan yahay, iyadoo waxna laga qaadanayo waxna lagu biirinayo, maxaa yeelay horayna uma jirin haddana mana jiri doonto cid ka sareysa talada iyo tusaalaynta, ama cid isku koobi karta xaqa, goor ay kuwa kalane wada khalad yihiin.

47- **Tacasub iyo Tacasub**

Waxaa iska caadi ah in qofka daaciga ah uu u tacasubo habka uu doortay, maxaa yeelay waxaa uu u dooratay waa in uu ku qanacsanyahay oo uu arko inay hababka kale ka wanaagsantahy, waxaase laga doonaya inuusan sheeganin in habkaasi yahay mid gaf la’aan ah oo dhamaystiran, waana in aanu dulminin hababka kale ee ay ducaaddu adeegsadaan, arrinkanina waxaa la dhihi karaa waa tacasub bannaan, wanaagsan oo waajib ah, hadii uu intaa khilaafo waxaa uu noqonayaa tacasub xun oo xaaraan ah oo uu Islaamku ku sifeeyay

jaahiliyad, tani waxa ay keenaysaa inaan had iyo jeer xasuusnaano in halbeegu yahay cabsida Alle iyo camalka saalixa ah, arrinkaasoo qasab ka dhigaya in laga fogaado tacsubka jaahiliga ah, sida in loo tacasubo gobol, beel, ama koox dad ah.

## 48- **Kala Mudnaanta Hawlaha**

Waxaan hoosta ka xariiqaynaa aragtida ku salaysan kala mudnaanta hawlaha, qaddarin badanna waan u haynaa, waanna ku baaqaynaa arinkaasi, arrimaha Islaamku ma wada ahan hal darajo, tusaala ahaan arrinta iimaanka iyo towxiidka ayaa ka muhiimsan in badan arrinta ah in dariiqa laga qaado waxyaalaha wax dhiba, arrimaha dacwadana ma wada ahan hal darajo, sidaa darteed waxaa haboon in aan garano, arrin kastana meesha ay ku haboon tahay aan dhigno, sidoo kale waxaa haboon inaan markasta dib u eegis iyo dib u habayn ku samayno kala mudnaanta hawlahas iyada oo lala waafajinayo isbedelada jira, maxaa yeelay heerka kala mudnaanta hawlaha ee Islaamku waa mid sugan, balse kan hawlaha Islaamiga ah wuxuu isla bedbedalaa hadba xiliga, goobta iyo dadka, waxyaabaha la xiriira kala mudnaanta hawlaha waa inaan awood u lahaano  is barbardhigga dhibka iyo dheeftaba marka ay arrimuhu dhacayaan, kadibna aan doorano arrinka dhibkiisu yaryahay, waana inaan awood u leenahay kala doorashada laba arrimood oo wanaagsan, kadibna aan doorano midkooda sii faa’idada badan.

## **49- Fiqhiga Maqaasidda**

Waxaa laga doonayaa ducaadda inay garasho fiican u leeyihiin fiqhiga maqaasidda, oo ay aad ugu xeeldheeraadaan, umana banaana inay ku dhegaan nusuustaa daahirkeeda, ayna dul istaagaan xarfaheeda guud, taa macnaheeduna ma aha inay is halmaansiiyaan qiimaha nusuusta, balse waa in loo duso oo la gaaro nuxurka uu xanbaarsanayahay nasku, iyo in la is bar bar dhigo wax la isku raacsanayahay iyo waxa la isku

khilaafsanayahay, iyo in la fahmo qeybaha yaryar iyadoo lagu eegayo mabaad'iida guud iyo maqaasidda guud ee shareecada, iyadoo la raacayo qaacida fiqhiga ee oranaysa : (Cibradu waxa ay ku sugantahay maqaasidda iyo macnayaalka, laakiinse kuma sugna ereyada iyo dhismahooda) iyo midda kale ee oranaysa: ( arrimaha waxaa loola jeedaa maqaasidooda), waxaan shaki ku jirin in arinkaasi uu nooga baahanyahay inaan wax ka dhagaysano dadka ku takhasusay culuumtan.

## 50 **- Fiqhiga Bar-Dhamaadka**

Waxaan laga doonayaa ducaadda inay aqoon u leeyihiin fiqhiga bar-dhamaadka, kaasoo loola jeedo natiijooyinka iyo qaabka ay arrimuhu noqon doonaan marka ay qaataan go'aan caynkaa ama caynkeer ah, arrinkanina waxa uu lagama maarmaan ka dhigayaa in aqoon xeeldheer loo leeyahay sunanka Alle (CW), iyo garasho ballaaran oo ku aadan duruufaha gudaha dalka, kuwa gobolka iyo kuwa caalamka, sidaa darteed waxaa waajib ku ah ducaadda inay iska fiiriyaan natiijada ka dhalan karta go'aan kasta inta aysan gaarin, waana inay garanayaan saamaynta uu ku yeelanayo iyaga iyo cidda ku hareerysanba, waana inay go'aamdooda ku dhisaan yaqiin ee aysan ku dhisin malo, iyo degnaansho aan degdeg lahayn, iyo karti aan malo awaal ahayn, taariikhda camalka Islaamiga ah waxaa soo maray go'aamo fudayd ku yimid oo aanan laga fiirsan, kuwaa oo loola jeeday in shar lagu hor istaago, khayrna lagu sameeyo, natiijadiise ay noqotay jab aan laga soo waaqsan iyo musiibo dhalisay dhibaatooyin is wada dabajooga.

## 51- **Fiqhiga Waaqaca**

Ducaadu waxaa looga baahanyahay inay awood u leeyihiin garashada fiqhiga waaqaca, iyo inay aqoon dhab u leeyihiin duruufaha iyo xaaladaha la xiriira waaqaca, iyo inay garanayaan masaafada dhabta ah ee u dhaxaysa rajooyinka laga dhursugayo iyo awoodaha la leeyahay,

sidaa datreed shicaarkooda, hadafkooda iyo barnaamijtooda waxay noqonayaan kuwo la dhaqan gelin karo, kaasina wuxuu dalbayaa in laga shaqeeyo caqliyada iyo damiirka dadka, iyo in dadka dhamaan lagu kulmiyo arrimo cad-cad oo loo xushay si farsamo ah, iyo ilaalinta waxyaalaha daruuriga ah, iyo in la raaco sunnada saanqaadka isdaba yaal.

## 52- Kobcinta Dareenka Khataraha

Muslimiintu waa ummad bartilmaameed ah intii ay jirtayba, maxaa yeelay waa ummad risaalo iyo dacwo xanbaarsan, sidaa darteed waxay halis u tahay khataro kaga imaanaya dhinaca cadawgeeda, maxaa yeelay cadawga intooda badan xaqa ayeey nacebyihiin, marka waxaa haboon in aan ka hawlgalno sidii aan u kobcin lahayn dareenka ku aadan khatarahan ku wajahan ummadda Islamka, taa oo keeni karta in la isu soo dhawaado lana necbaado khilaafka, intaa kadibna dhamaan muslimiintu waxa ay halis u yihiin oo bartilmaameedsanaya khatrahan, aqoondarrada iyo ku baraarugsanaan la’aanta khatrahan waxa ay ka dhigaysaa mid dhibaato badan reebta, khataruhuna waa laba nooc: khataraha dibadda ah oo ka imaanaya dhinacyada kale, iyo kuwa gudaha ah oo ka soo dhex baxaya ducaadda dhexdooda, taariikhduna waxa ay inoo sheegaysaa in khatarta guduha ka dhibaato iyo argagax badan yihiin kuwa dibedda.

## 53- Walaaltinimada Islaamka

Walaatinimada Islaamka waa mabda’a qoto dheer oo kamida mabaadi’ada Isalaamka, iyo tiir adag oo kamid ah asaaska camalka dacwda, inay faaftana waxa ay keentaa raali ahaanshaha Alle, iyo guul muslimiintu guuleystaan, in la waayana waxa ay sabab u tahay carada Alle, iyo guuldaro muslimiintu guul daraystaan, ducaaadana waxaa waajib ku ah in ay sare u qaadaan arrinka walaaltinimada Islaamka,

dhanka fikirka iyo dhanka dhaqankaba, waana inay ka digtoonaadaan wax waliba oo arrinkaas khilaafaya, hirgelinta walaaltinimada ducaadda dhexdooda waa dugaal iyo naxariis, kaalmo iyo gargaar, iyo bishaaro kugu hogaamisa guul, maqnaanshaheeduna waa taa badalkeed, waa colloobid iyo qalbi kakanaan, la keli noqosho iyo talo maroorsi, iyo digniin kugu hogaamisa jab iyo burbur.

## 54- **Dacwada Islaamku Waa Mas'uuliyad Guud**

In dadka islaamku loogu yeero waa waajib saran dadka oo dhan, kumana koobna ardayda shareecada barta oo kaliya, inkastoo ay mas'uuliyadda ugu weyn ay iyaga saarantahay, waxaase la doonayaa inaan xasuusanaano in Islaamku aqbalayo nooc walba oo dadka kamid ah, fulayga iyo geesiga, bakheylka iyo deeqsiga, doqonka iyo caaqilka, iyo wixii la mid ah, balse hoowlaha dacwada oo ah kuwa qaddarin iyo muhimad gooni ah leh waxay u baahan yihiin dad qiimo badan oo leh sharaf iyo deeqsinimo, geesinimo iyo dulqaad, go'aan qaadasho iyo raganimo,  xaq-soor iyo naf-hurnimo, waxaana haboon inaan xoogga saarno dadka sifooyinkaa leh, oo aan soo xulanno, dacwadana ay hormuud u noqdaan, dadka noocaas ah waa qurux xaaladda nabadda iyo baraaraha, waana miciin xaaladda ay duruufaha adagi jiraan, kuwa noocaa ahi ayay dacwadu  ku dhisantaa, taa macnaheeda ma aha inay ceeb iyo nuqsaan ka maran yihiin, qof kasta khalad waa yeelan karaa, balse macnuhu waxaa weeye in wadajirkoodu samaynayo qiimo aad u sareeya, haddii ay gafaan wadada saxda ah ayey u laabtaan, danta gaarka ahna waxa ay ka hormariyaan midda guud, muuqaalka sarana nuxurka, khayaalkana xaqiiqada, mabda' ayeeyna ku sugnaadaan khatar kasta oo jirta, tan iyo inta ay Alle kala kulmayaan, markasta oo ducaadda noocan ah bataan, oo qolyaha kale ee aan lahayn tilmaamahan wanaagsan ku yaraadaan dacwadda, waa astaan muujinaysa guul, taa badalkeed haddii ay dhacdana guul darro aya dhacaysa.

## 55- **Xamaasad Xakamaysan**

Xamaasaddu waa khayr iyo barako, maxaa yeelay waxay kicisaa oo awoodda go’aan qaadashada, kartida waxqabad, hindisaha, deeqsinimada, tartanka, naf-hurnimada, iyo hal-abuurka iyo wixii la hal maala oo sifooyin wanaagsan ah oo keeni kara in camalka dacawadu hormar sameeyo. Qaddarka ay ducaaddu ka haystaan awooddan ayeey hawshoodu horumar samaysaa, inta ay awoodoodaan hoosayso ayeey hawshooduna hoosaysaa, ducaaduna waxa ay ka caado dhigteen inay shidaan xamaasadda, taasoo ah arrin wanaagsan, balse waxaa lagama maarmaan ah in la ilaaliyo laba arimood, midda koowaad: waa in qiyaasta xamasaddu ay ahaato mid si xeeldheer loo jaangooyay, taasoo la mid ah daawada dhaqtarku u qoro dadka xanuunsan, taasoo uu u xadido qiyaasta uu qaadanyo oo aan nuqsaan iyo siyaado midna lahayn, sidaa darteed xamaasadda dheeraadka ah ee shabaabka dhexdooda ah waxa ay dhalisaa laab la kac iyo seef la boodnimo, u soo ban baxda qaab khaldan, midda labaad daaciga xikmadda badan waa inuu u gogol xaaro dadka asaga la shaqeeya waddooyin hagaagsan oo ay ku shubi karaan xamaasadooda, si ay u dareemaan in ay nafci leeyihiin, waayoo waxa ay sameeyeen wixii ay kari kareen, waxayna ka badbaadiyaan dareenka xagga qalbiga ah oo dhibaatayna haddii aanay hawl qabanin, taasoo haddii ay shaqo qabtaan ay farxayaan xasiloonina helayaan, dadkuna ay ku intifaacayaan waxqabadkooda.

## 56- **Hawlaha Islaamiga ee Rasmiga ah iyo Kuwa Shacbiga**

Camalka Islaamiga ah ee rasmiga ah waa midka ay hay’adaha dowladda raacsan ay qabtaan, camalka Islaamiga ee shacbiga ahna waa midka ay hay’adaha shacbiga ah oo aan dowladda raacsanayn ay qabtaan, sida caadada ahna - inta badan - waxaa dhacda in ay jirto mala xumo ama cadaawad dhex marta labada dhinac, waxaana lama huraan ah inaan xasuusanaano labo arimood, midda koowaad: majirto labada dhinac cid

wada khaldan ama wada saxan, labaduba waxa ay leeyihiin sax iyo khalad, midda labaad: waxaa dhici karta in ay kaalimaha is weydaarsdaan, oo hawsha shacbiga ah ay noqoto mid rasmi ah, ama midda rasmiga ah ay noqoto mid shacabi, marka waxaa la doonayaa mid waliba inuu muujiyo dadaal dheeri ah iyo xikmad khaalis ah si loo abuuro kalsooni buuxda, isfaham, iskaashi, iyo is cafin, maxaa yeealy dacwadu waa masuuliyad wada saran dhamaan dadka, haddii intaa la helo faa'iidooyin badan ayaa la gaarayaa, haddii la waayana labada dhinacba waxaa ku dhacaya guul darro. Arrintu ma aha mid fudud, sidoo kalana ma aha mid mustaxiil ah, ahmiyadda uu arrinku leeyahay dartii waxeey u baahantahay inaan gelino dadaal dheeri ah.

## 57- Ikhlaas iyo Toosnaan Labadaba

Ikhlaasku waxa uu ku leeyay Islaamka dhexdiisa makaan aad u sareeya, maxaa yeelay waa halbowlaha howlaha laqabto iyo shuruudda lagu aqbalo, howshii aan lahayn ikhlaas waa mid lunsan oo aan natiijo lahayn, balse ikhlaaska kaligiis wax anfici maayo, waayo waxaa dhici karta inuu ikhlaas jiro laakiin aanay shaqadu toosneyn oo aysan sax ahayn, tusaale ahaan khawaarijtu aad ayeey u ikhlaas badnaayeen balse aad beey u khaldaad badnaayeen, sidaa darteed waxaa la doonayaa inay isla xiriirsanaadaan ikhlaaska iyo toosanaanta, labadooda oo wadajira ayaa guul lagu gaaraa, sidaa darteed waxaa waajib ku ah ducaadda inay gartaan qiimaha ay leedahay toosanaanta iyo sax ahaanshaha, ayna ku dedaalaan sida ay ugu dedaalayaan ikhlaaska, labo sababood dartood, midda koowaad waa qiimaha toosnaantu iyo inuu mataan la yahay gusha, shardina u yahay, qeyb kmid ahna yahay, midda labaadna: ducaadda intooda badan waa kuwa qalbi wanaagsan, waxaana sahlan in la duufsado, oo lagu dhex dhuunto oo la dhagro, dhiiqana lugaha loo geliyo, mararka qaarna waxa ay dedaal badan ku bixiyaan hawl laga haboon yahay ayaga oo baal mara tii ay ahayd inay qabtaan, mararka

qaarna dedaal aan loo baahnayn ayeey bixiyaan, mararka qaarna – jahli iyo doqonimo darteed- waxa ay dedaal ku bixiyaan meelo khaldan, ayaga oo noqda xaabada ugu horaysa iyo dadka ku waxyeelooba khaladkaa, waaqaca cusub oo ka dhasha shaqada la qabtayna uu noqdo mid ka xun kii horay u jiray.

## 58- **Gabood-fal Weyn**

In badan oo kamida waxqabadka muslimiinta oo ducaadduna kamid yihiin waxa uu ku astaysan yahay gabood-fal weyn oo dhinacyada diinta iyo addunyadaba ah, waana arrin ka hor iamanaysa nicmooyinka faraha badan ee Alle ku galadaysatay muslimiinta taasoo ehel uga dhigaysa inay hogaamiyaan caalamka, iyo xadaaradda adduunka horumarinteeda, nicmooyinkaa oo ay kamid yihiin caqiido sax ah oo dhiirigelisa, hanti waasac ah, deegaan istraatiiji ah, iyo koror dad oo si xawli ah ku socda. Sidaa darteed waxaa laga doonayaa dadka caqliga u saaxiibka ah inay diraasad ka sameeyaan mushkiladdan si ay muslimiinta uga saaraan hawlgabnimada oo ay ka dhigan dad firfircoon, iyo gaabis oo ay u saaran hormar, waxyaabaha arrimahan ka qeyb qaadan kara waxaa kamid ah: dhiifoonaan, hal-abuur, is qiimeyn, tartan, suubanaan, fursado is la eg, hawl hay'adaysan, dadka hawsha wanaagsan qabta oo la dhiiri geliyo, dadka gafa oo la xisaabiyo, iyo shaqo jacayl.

## 59- **Mu'aamarad**

Xilliyadii ugu dambeeyay waxaa aad u batay ka sheekaynta mu'aamarado lagu hayo hawlaha Islaamiga ah, dadka qaar waxa ay ka dhigaan wax baahsan, qaarna jiritaankeeda ayeey inkiraan, qaarna waa ka gaws-qabsadaan in ay ka hadlaan, xaqiiqaduse waxa ay tahay in mu'aamaradu ay soo jirtay intii ban'iiaadamku jiray, weyna sii jiri doontaa, ha yeeshee sax ma aha caqli ahaan iyo diin ahaan inaan arrin kasta siino fasiraad mu'aamaradeed, waana inaan ogaano in

mu’aamaradu marna guulaysto, marna fashilaanto, marna waxa ay dib ugu laabataa oo dhibaataysaa dadkii waday, waana inaan ula falgalnaa si ka fog labada dhinac ee iska soo horjeeda oo khaladka wada ah, kuwaasoo ah buunbuunin iyo hoos u dhigid, waana inaan siinaa xajmigeeda dabiiciga ah, waana inaan ku mashquulnaa xeerarka loolanka iyo heshiiska nagala dhexeeya dhinacyada kale in kabadan inta aan ku mashquulayno tafaasiisha loolanka, waana inaan khaladaadkeena aanan dad kale u tiirinin. Mu’aamarada inay jirto waxa nooga daran waa inaan is halmaansiino jiritaankeeda, ama aan weynayno, ama yarayano, ama si aan sax ahayn aan ula falgalno, ama sababaha in aan la nimaadno uu Alle a faray aan ka gaabino oo aanan la imanin.

60- **Xayndaabka Saamaynta iyo Midka Danaynta**

Nolosha muslimku waxa ay leedahay labo xayndaab, midka koowaad waa xayndaabka saamaynta, kaasoo loola jeedo wixii uu awood u leeyahay oo uu wax ka qaban karo uuna ku anfici karo naftiisa iyo tan dadka kalaba, sida inuu daryeelo caafimaadkiisa, noloshiisa, wax la qabashada qaraabada iyo asxaabta, iyo in uu dacwada ugu yeero dadka la nool, awoodiisana uu dhiso, qoyskiisana uu daryeelo, inuu aqoon u yeesho xeerarka nidaamiya shaqadiisa iyo dalkiisa … iwm. Midda labaadna waa: xayndaabka danaynta, oo loola jeedo la socoshada arrimaha maxaliga ah iyo kuwa caalamiga ah taasoo uusan wax saamayn ah ku yeelan karin, in yar iyo in badan midna, sida sare u kaca sarifka doolarka, doorashooyinka madaxweynaha Mareykanka, wasakhoobidda hawada, duleeshanka Ozen-ka. Muslimka caqliga badan waxaa laga doonayaa inuu xoogiisu isugu geeyo xayndaabka koowaad, waayo waxa uu awoodaa inuu saameyn ku yeesho, waana wax sharci ahaan laga doonayo. Xayndaabka labaadna waa inuu ula falgalo sida ugu kooban, si uu u noqdo nin la socda waxa dunida ka jira, xiriirna la leh dhinacyada kale. Haddiise uu isku ballaariyo waxa uu ku dhacaya khaladkii laga

reebayay, waqtigiisa, xoogiisa iyo maskaxdiisana waxa uu ku luminayaa wax murug gelinaya oo uusan waxba ka qaban karin, waxana uu ku dhamaanayaa meertada walbahaarka, fashalka iyo tiiraanyada, waaxaana laga yaabaa inuu go'doon ku dambeeyo, kadiban uu kari waayo inuu wax ka qabto wixii uu awoodda u lahaa, kadibna uu bilaabo inuu cudurdaar samaysto, amaba waxa uu masuuliyadda fashalkiisa dusha ka saaraa qaddarka. Waxaana jira xikmad oranaysa: dadka guulaysta waxa ay macallimiin ku yihiin sidii ay u heli lahaayeen xalal la kala dooran karo, kuwa fashilmana waxa ay macallimiin ku yihiin sidii ay u heli lahaayeen waxyaabo cudurdar u noqon kara.

## 61- **Ahmiyadda Luqadda Carabiga**

Luqaaddu waxa ay weelaysaa cilmiga iyo aqoonta, waana habka lagu wada xiriiro, waana arrinta ugu muhiimsan ee aasaaska u ah haybta dadka, meeqaan aad u sareeya ayeeyna ku leedahay nolosha dadka. Luqadda carabiguna waxa ay astaantaa la wadaagtaa luqadaha kale, waxayse dheer tahay inay tahay luqaddii Alle (CW) uu u doortay in lagu soo dejiyo quraankiisa kariimka ah, Alle (SW) – oo xikmadiisu xeeldheer tahay- asaga ayaa naga ogsoon meesha uu ku dejinayo risaaladiisa; haddii ay ahaan lahayd, goorta, goobta, dadka iyo luqadaba, luqadda carabigu waxa ay ahayd luqadda quraanka kariimka iyo sunnada daahirka ah iyo inta badan hidaha Islaamka, taariikhduna waxa ay na tusaysaa deegaanadii faafinta Islaamka ay la socotay faafitaanka luqadda carabiga ah waxa ka dhashay faham wanaagsan iyo jirtaan joogto ah oo uu Islaamkii ka sii jiro, xitaa kadib markii ay dawladihii Islaamiga ah taagdareeyeen oo ay burbureen, sidaa darteed waxaa haboon inaan ka hawlgalno faafinta luqadda carabiga intii karaankayaga ah in lagu faafiyo dalalka muslimiinta ah ee aan carabta ahayn, iyo meel kasta oo ay ka socoto hawl dacwadeed.

62- **Jaangoynta Ujeedooyinka**

Hawl kasta oo dacwadeed waxa ay leedahay ujeedooyin ay doonayso in ay xaqiijiso, jaangooynta ujeedooyinkaana waa arrin aad muhiim u ah, sidaa darteed waxaa haboon in ducaaddu ay jaangooyo cad u sameeyan shaqada ay doonayaan in ay qabtaan, isla mar ahaantaana ay si cad oo ay ka baaraan degeen ay u qoraan, ayaga aad isha ugu haya erayada iyo jumladaha ay isticmaalayaan, dhanka sax ahaanta, caddaanta, baahida loo qabo, awoodda loo leeyahay fulinteeda, ciddii isku khalda – qof ama koox- yididiilooyinka wanaagsan ee ay adagtahay in la xaqiijiyo, iyo waaqaca dhabta ah ee jira, guuldaradiisa ayaa ka weyn guushiisa, waxaana laga yaabaa in burbur iyo baaba' uu ku dambeeyo, gefkuna marka uu ka dhaco qof waa mashaqo, haddiise uu ka dhaco kooxo waa mashaqo aad u weyn. Dhaliilaha ugu macnaha badan ee loo jeediyo camalka dacwadana waxaa kamida inta badan ducaaddu waxa ay yaqaanaan waxa aysan rabin, haseyeeshee ma yaqaanaan waxa saxda ah ee ay doonayaan, marka camalka dacwadu yeesho ujeedooyin khaldan, ama kuwa sax ah oo aan suurogal ahayn, qofku waxa uu dhibaataynayaa naftiisa maadaama uu dabo socdo dhaan-dabagaalle oo aan la gaarynin, markaana niyadda wanaagsani waxba tari mayso, sababtoo ah niyadda wanaagsan waa qeyb shaqada kamid ah halka qeybta kale ay tahay saxnaansha hawsha la qabanayo. Ducaadda waxaa laga doonayaa inay si cad u garanayaan (cidda ay yihiin), iyo (waxa ay doonayaan), halkaana ay ku jaangooyaan qorshaooda iyo barnaamijkooda, sidaana ay ku noqdaan dad aamin ah oo runta u sheega naftooda iyo dadka ay dacwada ugu yeerayaanba, haddii ay sidaa yeelaana hawl fiican ayeey qabteen haddii kalena waa xanuun iyo dhibaato.

63- **Geesinimo iyo Geesinimo**

Geesinimadu wa tilmaan wanaagsan oo aad u weyn oo laga doonayo ducaaddu inay ku sifoobaan, waayoo waa qalabka ugu muhiimsan ee

hawsha dacwada, hawl kasta oo dacwadeed oo geesinimo ay la socotana waxa ay leedahay sababihii ay ku guuleysan lahayd, hadii laga waayana waa astaan kamida astaamaha fashalka, waxaase jira nooca geesinimada ah oo ah in kaadsiinyo iyo ka joogsi la yeesho, iyo weliba in dib u gurasho lala yimaado, taasoo ku imanaysa go’aan sababyntiisa leh oo ka soo baxa marjaciyadda shaqada kadib falanqeyn ay ku dheehantahay saraaxad, nadiifnimo, xorriyad iyo masuuliyad, geesnimadanina waxa ay ka muhiimsantahay geesnimada horay u socodka, sababtoo ah midda kaadsiinyaha cidda ku dhaqaaqda uma aabayeelayso dhaliilaha kaga imanaya dhiacyada kale, aragtidooduna waa mid waasac ah, xisaabadka ay wax ku dhisayaan waa kuwa qoto dheer, go’ankiisuna waxa uu ku salaysan yahay qanaacadiisa, dib u gurashadii Khaalid Bin Waliid (RC) ee dagaalkii Mu’uta ayaana ah daliil cad oo arrinkan loo soo qaadan karo.

### 64- **Meeqaan aan la Dalbi Karin**

Hawsha dacwadu waa shaqada ugu sharfta badan ee la qabto nolosha, waayoo waa shaqadii nabiyada iyo rususha NNKHA, waxaana caado ah – inta badan- in ninka daaciga ah uu mutaysto ixtiraamka dadka oo dhan iyo jacaylkooda, uuna yeesho meeqaam sareeya. Waxaase muhiim ah in qofka daaciga ah aanu baadi goobin meeqaamkan isaga ah, balse waa in u hawshiisa Alle u kali yeelo oo ikhlaas la yimaado, haddii meeqaamkan uu helana asaga oo aan doonin waa arrin wanaagsan, waana inuu Alle (CW) ku mahadiyaa, waana inuu ku dedaalo inuu ahaado qof u qalma heerkaa, dadkana uu ku qaabilo jaceyl, dabacsanaan, adeeg, ka dhawrsoonaansho wixii gacantooda ku jira, waana inuu u arko inay tahay mas’uuliyad ee aysan ahayn sharaf, iyo inay tahay culeys ee aysan ahayn xarago, iyo culeys ee aysan ahayn dheef, iyo shaqo ee aysan ahayn sharaf.

65- **Waa Risaalo ee ma aha Meherad**

Hawsha dacwada hadii ay iska badasho inay tahay risaalo oo ay isu badasho meherad ama wax lagu shaqaysto - waana sida inta badan dhacda- qalfoofka ayaa ka xoog badnaanaya nuxurka, fadhiidnimadana waxa ay ka sara maraysaa firfircoonaanta, la keli noqshada ayaa bara bixinyasa naf hurnimada, kuwa wax ku andacooda ayaana qaadanaya kaalinta dadka asalka ah, munaafiqiinta ayaana ka hormaraya dadka mukhlisiinta ah, waxaasi oo idilna waa musiibooyin u dhacaya heerar kala duwan shaqada dacwada dhexdeeda, marka ay dacwadu ka leexato inay tahay risaalo oo ay isu bedesho meherad, muslimiintana waxa ay dhabarka u jeedinayaan hawsha dacwada, cadawga dacwaduna waxa uu helayaa hub uu dacwada kula dagaalamo.

66- **Muslimiinta Cusub**

Waxaa caadi aha inuu qofka muslimka ah uu ku farxo qof kasta oo Islaamka soo gala, laakiin sida dhacda mararka qaarkood faraxani waxa uu noqdaa mid xad dhaaf ah oo keena khaladaad laga fursan karo, hadaba si aan u gaarno danteena iyo danta qofka islaamka ku cusub, ugana badbaadno khalaadaadka dhici kara waa inaan hubsano niyadda qofka islaamka soo galay iyo ujeedadiisa, garaadkiisa, toosnaantiisa, iyo xikmaddiisa, isla markaana waa inaan u caawino si dagan inta uu ku xididaysanayo Islaamka, dhanka niyadda, fahamka, iyo dhaqankaba, sidaa ayuuna ku ahaanayaa qof si caadi ah ugu dhex barbaara Islaamka dhexdiidsa, haddiise aan qofka xadkiisa dhaafino sida dhanka dhaqaalaha iyo sharfidda waxa aan u ekeysiinaynaa inuu yahay qof calooshii u shaqayste ah, waxaanan ka dhigaynaa qof is la weyn oo isu arka inuu yahay macallin weyn oo ay tahay inaan asaga wax ka barano.

## 67- **Madaahibta Fiqhiga**

Madaahibta fiqhiga ah guud ahaantood, gaar ahaan afarta ugu waawayn, waa hiddo aqooneed oo qiimo badan ku fadhiya, tasoo ay qoreen culimada muslimiinta, qarniyaal bandanna soo jiray, waxayna kamid tahay waxyaabaha ay muslimiintu ku faanaan, muslimka waxa uu xaq u leeyahay inuu ka doorto mad-habkii uu doono, waxaanan kula talinaynaa inuu aqoon u yeesho – intii karaankii ah- daliilka madaahibta, waana in uu ixtiraamo xulashada dadka kale, waana inuu si edeb iyo mawduuciyad ku jirto uu ugala doodo markii ay timaado dood cilmiyeed, xaqa inuu ku dedaalo, kuna farxo, xaqu ha jirsado dhinaciisa ama dhinaca kale ee dooddu kala dhexeyso, dhamaan madaahibtani waxa ay leeyihiin dhinacyo sax ahi yo ku khalad ah, kuwa fadli badan iyo kuwa laga fadli badan yahay, arrinkaasina waa mid ay go'aaminayaan culimada diinta ku xeeldheer, oo awoodda u leh inay sameeyaan is barbardhig, kala xulasho, iyo cusboonaysiin. In si xun loogu tacasubo madaahibta waa arrin dhibaato badan leh, haseyeeshee in hoos loo dhigo qiimahaeeda, lala dagaalamo, muslimiintana loogu baaqo inay isaga tagaan, si toos ahna ay uga qaataan axkaamtooda qur'aanka iyo sunnada ayaa ka dhib badan arinka hore. Waxaan iyadana suurogal ahayn in lagu baaqo in madaahibta la baab'iyo, dadka baaqa noocan ah wada oo ku heshiiya axkaam fiqhi ah oo ay doorteen kuwaa oo leh culimadooda waxa ay aasaaska u dhigayaan – ha ogaadaan ama yaanay ogaanin – mad-hab cusub, waxa ayna ku dhacayaan wixii ay ku dhaliileeyn madaahibta kale.

## 68- **Haweenayda Muslimidda ah**

Haweenka muslimiinta ah waxa ay la il-daran yihiin dulmi badan oo kaga imaanaya laba dhinac oo xagjir ah. Kan koowaad: calmaaniyiinta xagjirka ah oo ka shaqaynaya inay fasahaadiyaan haweenka muslimiinta, iyo inay ka fogeeyaan diinteeda, fidradeeda, sharafteeda iyo waxyaabaha

gaarka u ah. Kan labaad: xagjirnimada diineed oo hawsheedu tahay inay haweenka muslimiinta ah ka dhigan kuwa hawlgab ah oo aan nolosha dawr ku lahayn, dadkan xagjirka ahna waxa ay ku eedeysan yihiin xataa haddii ay niyadoodu sax tahay, aragtida ay ka qabaan haweenka ayaa ah mid shaki, tuhun, iyo xaqirid ay ku dheehan tahay, waxayna khalad ka fahmsanyihiin mabda' masuuliyadda ragga ay mas'uul ka yihiin haweenka " Qiwaama", arrinkaana waxa uu u laabanyaa jahliga ay kaga sugan yihiin xuquuda haweenku ku leeyihiin Islaamka, iyo shakhsiyadeeda, iyo dhaqanka iyo hiddaha bulshada ee aadka u baahsan, taasoo loo geliyay dhar diimeed, taasoo aanay diintu wax shaqo ah ku lahayn. Waxaa waajib ku ah muslimiinta guud ahaan, iyo gaar ahaan ducaadda in ay ku kalsoonaadaan haweenka, ayana u diyaariyaan inay kaalin mug leh ku yeelato nolosha, taasoo ay ugu horayso dhanka dacwada, cadaaladduna waa mabda' Islaami ah, waana in lagu intifaco waxqabadkeeda dacwadeed, gaar ahaan meelaha ay haweenku kaga horeeyaan ragga, iyo in laga hortago baaqyada baadnimada ee doonaya in ay haweenka lug gooyaan ayaga oo sheeganaya in ay xoraynayaan, iyagoo sabab ka dhiganaya dulmiga haweenka ku dhaca. Islaamka ayaa ah midka xoreeyay haweenka xoreyn cadaalad ku dhisan oo isu miisaaman, xuquuq badanna waa uu u ilaalay, sidoo kale waxa uu dhawray sharfteeda, madaxbanaanideeda, fidradeeda, waxyaabaha ay gaarka u leedahay, waxa uuna ka dhigay mujtamaca barkii, ragga walaalahood, iyo midda dhista jiilalka soo socda.

## 69- **Guud Ahaanshaha Cibaadada**

Yoolka jiritaanka ban'iiaadamka waa caabudida Alle (CW) oo quraankiis ku yiri: " وَمَا خَلَقْتُ الْجِنَّ وَالْإِنسَ إِلَّا لِيَعْبُدُونِ " الذاريات:٥٦ Jinni iyo Insi waxaan cibaadadayda ahayn uma abuurin" al-Daariyaat: 56, fahmkan guud ee cibaadada ayaa ka dhigaya dadka kuwa Alle (CW) si aad ah u caabuda, kuna farxsan xiriirkiisan joogta ah, una nafci badan

dadka iyo dunidaba, waxaana wax laga xumaado ah in fahmkan guud ee cibaadada ay dadka badankood ku soo koobaan shacaa'irta cibaadada, sida; salaadda, soonka, sakada iyo xajka, taasoo ay cibaadada dhamaanteed u arkeen inay intaa ku kooban tahay, waxaana xusid mudan in erey-bixintan sidan wax u qaybisay ay tahay mid sal ku leh hiddaha aqooneed ee Islaamka oo u kala qeybsan: caqiido, cibaado, iyo mucaamalaad, waana qeybin cilmiyeed oo ay keentay baahida diraasadda iyo barashada culuumta, mana ah wax intaa dhaafsiinin, qeybintanina waxa ay keentay in dadka qaar ay cibaadada ku soo koobaan shacaa'irta cibaadada oo keliya, waana gef aad u xun oo faafitaankiisu ay sababtay faham khaldan, iyo in shacaa'irtu ay noqoto mid si gooni ah u qaadatay muuqaalka cibaadada. Sidaa darteed waxaan rumaysannahay cibaadada macnaheeda guud oo ay salafu saalix rumaysnaayeen, qof kasta oo muslim ahna waxaan ugu baaqaynaa inuu qaato fahamkan cibaadada ee si guud u kulminaya: caqiidada, siyaasadda, shacaa'irta cibaadada, mucaamalaadka, horumarinta dhulka, gudashada waajibka dacwada, adeegsiga waxyaabaha xalaasha ah, baashaalka, hawsha oo si sugan loo qabto, samofalka…iwm.

## 70- **Dhanka mustaqbalka Wanaagsan**

Waqtigu, amarka Alle (CW) awgii waxa uu ku jiraa socod joogto ah oo aan hakanaynin, xilliga aan joogno waxa uu ka soo dhex baxay kii tagay, kan soo socdana kan ayuu farac ka sii yahay, hawsha dacwadana waxaa laga rabaa inay ka faa'iideysto khibradihii la soo maray, xilliga la joogana ay si fiican ula falgalaan, mustaqbalkana ay u diyaar garoobaan, ayna intii karaankooda ah la yimaadaan tilaabooyinka loo baahan yahay, taladana ay u daayaan Alle ayaga oo rumaysan, talana saaranaya, sidaa darteed in mustaqbalka loo diyaar garoobo, qorshooyin loo sameeyo waa waajib saaran ducaadda, waana asbaab muujinaysa bisaylkooda, iyo sababta guusha, haddii ay taa yeelaan waa arrin wanaagsan, haddii aanay

yeelin tareenka ayeey ka harayaan, waxayna noqon doonaan taariikh laga sheekeeyo, kadibna maalmuhu halmaamaan. Islaamku waa diinta mustaqblaka, waxaa taas caddaynaya arrimo badan oo ay kamid tahay in uu mar kasta noogu yeero in Alle goor kasta iyo goob kasta naga war hayo, ayna tahay inaan u diyaar garawno maalinta xisaabta, sababtoo ah mustaqbalkeena xaqiiqiga ah waa halkaa, dhamaanteenna waan wada garanaynaa sheekadii nabi Yuusuf (CS) markii uu masar ka badbaadiyay gaajada sanadihii ay abaaruhu ku dhufteen, taasoo ay sabab u ahayd qorshihiisii wanaagsaana ee mustaqbalka, rasuulkeena Muxamadna (CSW) waxaa uu ahaa mid si gaar ah u daneeya mustaqbalka dhamaan talaabooyinkiisa uu qaadanayo, taasoo ay kamid tahay tafaasiisha faahfaahsan, taasoo ku cad hijradii saxaabada ee Xabashida, heshiiskii Yahuudda, ciidamadii sirdoonka ah ee uu hawlgeliyay nabigu NNKHA, dagaaladii uu hogaamiyay, dhambaaladii uu kla diray, ka warhayntiisii arrimaha gudaha iyo debedaba, iyo tirakoobkiisii tirada muslimiinta ee ku sugan magaalada Madiina Almunawara, iyo wixii la halmaala oo ay aad u faahfaahisay siirada nabiga ee sharafta badan.

71-**Falcelis**

Waxaan ka digeynaa falcelinta ay ku kacaan dadka muslixiinta ah qaarkood markii ay arkaan qalad xagga fahamka ama dhaqanka ah oo ay ku kacayaan dadka qaarkood, ayaga oo si xadka ka baxsan uga jawaaba ama dadkaa iyaga ah geliya ciriiri. Imaam Maxamed Cabdow waxa uu baqdin ka muujiyay khuraafaadka ku faafay muslimiinta dhexdooda, waxa uuna sare u qaaday qiimaha caqliga, waxa uuna geliyay meel uusan geli karin, gabyaagii weynaa ee Maxamed Iqbaalna waxa murugo geliyay wixii uu arkay oo ah cajsiga muslimiinta iyo fahamkooda khaldan ee ay ka qabaan qaddarta Alle, waxa uuna sare u qaaday awoodda qofka muslimku u leeyay inuu waxqabto, wuxuuna carrabaabay in qaddartu tahay halka uu fartiisa ku fiiqo, sida waxaa

lamida ah qolyaha ku fogaaday la dagaalanka bidcada, iyo la dagaalanka tacasubka madaahibta, kadibna ku baaqay in madaahibta la tirtiro, iyo kuwa arkay dharagta sida xun u faaftay kadibna doortay suhdi xagjirnimo ku dheehantahay.

72- **Guulo iyo Guuldaraysi**

Taariikhda islaamku waxay leedahey guulo ay ku dhaadato, oo sharaf iyo karamo siisay muslimiinta, sidoo kalana hawsha Islaamka waxa ay leedahay guulo la mid ah kuwaa, guulahaasna waa kuwa dhaqaajiya dacwada marka ay isu badasho waxqabad dardargeliya hawlaha mustaqbalka, sidaa si la mid ah guulahaasi waxa ay noqdaan kuwa dhibaatooyin abuura marka ay isu rogaan kuwa caajsinimo ku abuura ducaadda, warkoodana ka dhiga faan lagu faano taariikhahaa tegay oo keliya, sidaa oo kale ayaa la oran karaa khaladaadkii soo maray taariikhda Islaamka iyo ducaadda intaba, khaladadkaas waxa ay noqon karaan waxtar haddii lagu cibro qaato loogana gudbo mustaqbalka in wax wanaagsan la qabto, halka ay noqonayaan khaladaadku kuwa caqabad ah haddii aan ku ekaano shalayto, dhaliil, iyo is canaanasho.

73- **Marka Nolosha Mudnaanta Yeelato**

Jidka Alle oo lagu dhinto waa meeqaan sare oo uu Alle (CW) u hibeeyo qeyb yar uu ban’iiaadmka ka mid ah, waana arrin himilo u ah mukhlisiinta, haseyeeshee in Alle dartii loo noolaado waxa ay la mid tahay in Alle dartii loo dhinto, jihaadka wadada Alle lagu jihaado waa arrin loo baahan yahay oo sababteeda leh, hayeeshee mararka qaar waxaa laga yaabaa in Alle dartii loo noolaado ay ka nafci badan tahay in Alle dartii loo dhinto, taasoo ah marka ducaaddu ay awoodooda oo dhan isugu geeyaan sare u qaadada diinta Alle, u adeegidda ummadda, camiridda dhulka, iyo in tusaale wanaagsan loo noqdo mujamaca

muslimka ah oo gaara heer mujtamacaadka kale ay majeertaan oo ay u hiloobaan ku dayashadiisa.

## 74- **Caasinimo iyo Daacdnimo**

Qalbiga dadka waxaa uu leeyahay caasinimo iyo daacadnimo, xubnuhuna waa sidoo kale, hawlaha qalbiga ayaana ka horeeya, kuwa xubnaha, sabatoo ah qalbiga ayeey la xiriirtaa, waana jawharadda qofka, asaga ayaana ku riixa daacada ama macsiyada. In laga badbaado macsida xagga qalbiga ah ayaana ka adag in laga badbaado midda xagga xubnaha ah, in daacadda qalbiga la kasbado ayaana ka adag kasbashada daacadda xubnaha, muslimka waxaa waajib ku ah inuu ka fogaado macsida, uuna la yimaado daacadda, si uu isugu miisaamo labada shaqo ee gudaha iyo debadda, muuqaalka iyo qalbiga, niyadda runteeda iyo dhaqdhaqaa jirka.

## 75- **Ku Dhaqanka Diinta**

Ku dhaqanka diintu waxa uu u baahanyahay caqli baraarugsan, qalbi fayaw, si qofku u noqdo bar dadka ka dhex muuqata, iyo muuqaal wanaagsan oo la jecelyahay oo ay dadku ku daydaan, waxa aan dhiiri gelinayaa ku dhaqanka diinta ee noocaas ah, waxaanan ka digaynaa kaa lidkiis oo ah ku dhaqan diineed qooshan, kaasoo ah mid ka soo fulaya caqli aan miisaanayn, ama qalbi buka, ama labadooda oo wadajira, sababtoo ah waxyaabaha dhaqaajinaya iyo himilooyinkooda ayaa ah kuwa ku salaysan khayaal iyo masaalix, ama labadooda oo wadajira, qofka dhaqan diimeedkan lehna waa mid bulshadu aanay jeclayn, iyo muuqaal laga dido, dhaqan diineedka noocan ah waxa uu ahaa welina yahay sababaha dadka ka hor istaaga diinta Alle, dhibaatada ka dhalata saamynteeduna waxa ay khatar badan tahay ta ka dhalata macsida oo dadka samaynaya aan lagu xisaabinin inay ahlu diin yihiin, astaamaha diinta qooshana waxaa kamida, in xooga la saaro muuqaalka sare,

qalbigana la dayaco, sunooyinkana xoogga la saaro intii faralka xogga la saari lahaa, masaalixda shakhsiga ah oo xoogga la saaro, danta guudna la dayaco, astaamihiisana waxaa kamid ah in dadka dhaqanka noocan ah leh ay hawadooda, falalkooda xun iyo fadhiidnimadoodaba ay huwiyaan maro diineed, iyo inay u hanqal taagaan meeqaan aysan xaq u lahayn, iyo inay hoos u dhigaan dad badan oo meeqaan iyo ixtiraam sare ku gaaray dedaal iyo karti.

### 76- **Axaadiista Fitnooyinka Iyo Dagaalada**

Islaamku waa diin Alle xifdiyay, gargaarna ka haysta Alle, mustaqbalkana ayada ayaa iska leh, cadawgeeda haba necbaystaan haddii ay doonaan, taasina waxa ay ku caddahay kitaabka Alle ee xakiimka ah, axaadiista shariifka ah, bishaarooyinka waaqaca, iyo ifafaalaha mustaqbalka. Waxaana habboon in kalsoonida ducaaddu ay ku qabaan mustaqbalka Islaamka inay ahaato mid xoog badan, sababtoo ah waa mid sax ah, dhanka kalana kalsoonidan waxa ay kaalmo u tahay dedaalka ay ducaaddu bixinayaan, iyo ansaarta ay helayaan, waxaa xusid mudan in inta badan axaadiista ka sheekeysa fitnada ay yihiin kuwa daciif ah, kuwooda saxda ah oo tilmaamaya in arrimaha ummadda muslimku inay ka sii darto mooyee aanay ka soo raynaynin waa kuwa leh khusuusiyad gaar ah, xagga waqtiga, goobta, ama shakhsiga, taasoo ka hor istaagaysa inay yeeshaan sifo yaqiinimo, in la guud yeelana ka dhigaysa gef aad u weyn, sababtoo ah waxaa jira nusuus sharci ah oo awoodna leh si cadna u sheegaysa in guusha ay leeyihiin muslimiinta, sidoo kale arrinkani waxa uu khilaafaya sunnada kawnka, iyo dhacdooyinka taariikheed kuwoodii hore iyo kuwa cusub labadaba, sidoo kale waxa ay khilaafaysaa cadaaladda Alle (CW). Alle waxa uu ka hufanyahay inuu adoomadiisa ku kalifo inay diintiisa u gargaaraan, ballan qaadna uu siiyo, ayaga oo dareensan in jabkoodu yahay mid sugan, marka aan garano in arrinta faraca ah fahmkeedu ku xiran yahay

midda asalka ah ee guud, maluhuna ku xiran yahay midka la hubo oo go'an, waxa ay noqonaysaa in axaadiista fitnada aan dhigno makaankeeda saxda ah, annaga oo yaqiinsan in Islaamku yahay diin uu Alle u gargaarayo.

77- **Raaxo Xadka Dhaaftay (Taraf)**

Raaxada xadka dhaaftay waa fasaad maaliyadeed oo khatar ah taasoo dadka u hogaamisa fasaadyo kale oo nooc walba oo nolosha kamid ah leh, sidaa darteed ayuu Islaamku la diraray raaxadan xadgudubka ah, waxa uuna tilmaamay in faafitaanka uu ku faafo ummad ummadaha kamida ay ku hogaaminayso halaag iyo baaba', sidaa darteed ducaadda waxaa laga doonayaa inay ka hortagaan raaxada noocan ah lana dagaalamaan, waxaase jira raaxo kale oo laga yaabo inay ka khatarsan tahay taasoo loo baahan yahay in laga hortago, kaasoo ah raaxada xagga caqliga ah, kaasoo aad ugu dhex faafay ducadda qaarkood ama kuwa isu haysta inay ducaad yihiin, tusaale ahaan waxaad arkaysaa dad isku mashquulinaya diraasadaha la xiriira firqooyin baaba'ay, haddii ay wanaagsanaayeen iyo haddii ay xumaayeenba, taasoo aan ummaddu ku haynin wax mushkilad ah, waxaadna arkaysaa ducaad ka qoraysa firqooyinkaa fasal kamid ah bug ama bug dhamaystiran, marka aad aqrisana garan maysid ujeedada qoraagu ka leeyahay, mararka qaarna waxa uu qoraalka ka buuxiyaa macluumaad aan u adeegaynin fikradda uu doonayo inuu dadka gaarsiiyo, mararka qaarna ma aha macluumaad sax ah, sababtoo ah waxa uu doonayaa inuu u muujiyo aqristaha inuu yahay nin xog badan haya oo majaalkaa looga dambeeyo, mararka qaarna waxaad arkaysaa qof qoraalkiisu aanu caddayn, sababtuna waa in marka horaba aysan qoraaga u caddeyn fekradda, ama aanu ku dhiiran karin inuu caddeeyo xaqiiqada sababo jira awgeed. Tusaalooyinkan iyo kuwa la halmaala waa nooc kamid ah raaxada xagga caqliga ah, waxa uuna la mid yahay raaxada kale ee maadiga ah, haddii aanuba ka sii

liidan, waxaana lama huraan ah in ducaadda mukhlisiinta ee caafimaadka qaba ay ka digtoonaadaan in arrinkani uu yahay mid dayacaya waqtiga, maalka, dedaalka iyo ajarkaba, waana dhaqan ku tusinaya masuuliyad ka carar, waxaana laga yaabaa inuuba yahay mashquulin iyo lugooyo ay wataan dhinacyo kale oo doonaya inay ducaadda ka sii jeediyaan shaqadooda dhabta ah, niyadda wanaagsanina waxba kama badalayso natiijada.

## 78- **Diinta Tawxiidka iyo Midnimada**

Islaamku waa diinta tawxiidka iyo midnimada, ummadda muslimka ah Alle keligii ayeey caabudaan, dhaqdhaqaaeedan dunida guudkiisa ahna waa mid midaysan, waxaana laga doonayaa hawlaha dacwada inay noqdaan kuwa si gaar ah xil isaga saara midnimada haddii ay ahaan lahayd dhanka fekerka, dareenka, hawlgalka, waana in ay ka digaan kala taga dhanka fekerka, dareenka, iyo hawlgalka, midnimadu waa awood, naxariis, barako, iyo firfircooni, waxa ayna qofka gaarsiisa kaalmada Alle taasoo u horseeda guusha, kala taguse waa taa caksigeed. Hawsha dacwaduna ma aha mid weli awood u yeelatay in ay ummadda u xaqiijiso guulo u dhigma dedaalkii iyo nafhurnimadii tiradaa badnaa ee ay ducaaddu sameeyeen, inkasta oo ay leedahay shacbiyad aad u ballaaran, isla markaana uu yahay midka cabbiraya hammiga iyo yididiilooyinka ummadda, sababtuna waa dhawr arrimood oo ay ugu horayso kala tagsanaanta ducaadda dhexdooda ah oo mararka qaar gaarta nacayb iyo cadaawad. In la gaaro midnimada aanu doonayna ama aan u dhawaano waxaa gacan ka gaysan kara ikhlaaska, is jacaylka, ka tagidda doodaha la xiriira mas’alooyinka furuucda ah ee caqiidada iyo fiqhiga, kuwaasoo ay horay isugu khilaafeen culimadii hore iyo kuwii dambaba, taasoo qofkii haleela uu leeyhay ajar, qofkii gafana uu yahay mid cudurdaar leh.

## 79- **Is Burin Waxtar ah**

Waxyaabaha malo awaalka ee ducaadda qaarkood ay rumaysan yihiin oo faafay waxaa kamid ah in awoodaha ka soo horjeeda Islaamka ay yihiin kuwa midaysan xilli kasta, sida saxda ahna waa in awoodahan marna ay ku heshiiyaan la dagaalanka Islaamka marna ay ku kala tagaan, mararka qaarna waxa ay qaataan go'aano faa'iido u leh Islaamka iyo Muslimiinta, sababta arrinkaa ka dambaysa waxay doonto ha ahaatee. Sidaa darteed caqliga muslimka ah waxaa laga doonayaa inuu daraaso ku sameeyo awoodaha ka soo horjeeda, iyo iska horimaadka ka dhex jira, kadibna uu uga faa'iideeyo dalkiisa iyo dadkiisa, hadiise lagu mashquulo in arrinta la isku duubo oo laga dhigo mid hal dhan u wada socota waa mid khilaafsan sunnada Alle, iyo xqiiqada taariikheed ee hore iyo midda cusub, waana gaabis xaga caqliga ah oo ay uga dan leeyihiin dadka sidan samaynaya in ay ka baxsadaan masuuliyadda ka saran sidii ay dhabogal ugu samayn lahaayeen iska horimaadyadaan cadawga Islaamka dhexdiida ka jira iyo sidii xal loogu heli lahaa, waana dhagar qofku naftiisa dhagrayo, taasoo uu isaga dhaadhicinayo in gaabisnimadiia iyo fulaynimadiisu ay cudurdaar leedahay maadaama ay waajahayaan awood aanay ka hor tagi karin.

## 80- **Hirgelinta Axkaamta Alle**

Waxaa jira su'aal aad muhiim u ah oo ku saabsan sida shareecada Islaamka looga hirgalinayo wadamada ay mudada dheer ka maqnayd, isla markaan ay dib ugu hanan lahayd meeqaankii sare ee ay ku lahayd dunida, ugu horayntii ma jiro qof ku doodaya inuu jiro xal qura oo ku haboon xilli kasta, waxaase laga yaabaa in taladan soo socta ay noqoto mid ku haboon meelo badan: waxaa laga doonayaa ducaadda in ay had iyo jeer u codsadaan hirgelinta shareecada Islaamka si degan oo nabadi ku jirto oo aan qarsoodi ahayn, ayna tusaan dadka dhamaan xaqa ay ku leeyihiin Islaamka, iyo waajibka ka saaran, faa'idada uu habkani

leeyahayna waa inuu meesha ka saarayo cabsida madaxda, ama uu cabsidooda yaraynayo, arrinkan oo ah mid anfacaya madaxda iyo ducaadda labadaba, waxaa kale oo kamid ah in la dhaqaajiyo khayrka ku kaydsan madaxda qalbigooda kaasoo aanay banaanka soo dhigin sababtu ha ahaato gaabis, ama cabsi, ama hawo adduun, waxaa kale oo kamid ah in hirgelintu noqoto tillabo tillaabo, kaasoo ka kheyr badan ku soo booditaanka halka mar ah, isla markaana waxay hor istaagaysaa dadka qar iska tuurka ah, kuwa doonaya inay isku dhex qariyaan iyo inay doqomadu horbadaan mashruucan, sababtoo ah in qaab nabadeed wax loo raadiyo waxa ay ka hortagaysaa dhamaan arrimahaa, waxaana sidoo kale kamid ah inay awood u yeelato in mashruucu saxo khaladaadkiisa, sababta oo ah maadaama aanay qarsoodi ahayn khaladaadku banaanka ayeey yaalaan oo waa la arkayaa, taasoo ka duwan marka ay qarsoodi tahay oo wax waliba ay banaanka yaalaan. Waxaa intaa dheer in ducaadda ay waajib ku tahay inay naftooda kala dagaalamaan kursi jacaylka iyo shahwada xukunka, waana inay si cad u sheegaan oo aan laalaab lahayn inaysan lafahooda u doonaynin inay wax xukumaan, haseyeeshee ay doonayaan inay hirgeliyaan axkaamta shareecada Islaamka, ayna adeegayaal u yihiin ciddii hirgelinaysa shareecada, waxaana halkan aan soo qaadan karnaa xikmaddii qiimaha badnayd ee Sheekh Abulxasan Alnadawi uu muddo badan ku soo celcelin jiray taasoo ah inuu jecel yahay in Imaanku u guuro quluubta dadka xukunka haysta, intii dadka ahlu Imaanka ah ay u guuri lahaayeen xukunka oo ay iyagu madax noqon lahaayeen, xikmaddan oo ah ilhaam iyo waafajin xagga Alle ka timid, waana in ducaaddu arrinka ay had iyo jeer hortooda dhigaan oo ay ka shidaal qataan, xaalad kasta oo la joogana hirgalinta shareecada Islaamku suurogal ma noqonayso inta dadka intiisa badan ay ku qancaan ayaga oo aan la qasbin lana jujuubin.

81- **Ayaga ayaa Mas'uul ka ah**

Waxaa ka dhaadhacsan in badan oo ducaadda kamid ah in xil aanu ka saarnayn guuldarada ka dhalata dadaaladooda dacwadeed, arinkanina waa mid u baahan in la helo qaab lagu koontarooli karo, hadiise sidaa duuduubka ah loo daayo waa khatar wayn, taasoo ay ugu yartahay maqnaanshaha isla xisaabtan iyo wax is waydiin, iyo inay sinnaadan qofka wanaaga samaynaya iyo kan xumaanta samaynaya. Ducaadda haddii ay ikhlaas la yimaadaan, toosnaantana ay ku dadaalaan, intii karaankooda ah, waxa ay helayaan mahad celin, haddii ay guuldaraystaanna waa loo cudur daarayaa, haddii mid iyaga kamid ah uu ka maqan yahay shuruudahan saddexda ah ama ka badan waxa uu arrinkoodu ku dhamaanayaa guuldarro, ayaga ayaana mas'uul ka aha halka hawshu ku idlaato.

82- **Isla-waynin Laakiin**

Is-kala weynaanta muslimku is-kala weynaado xumaanta waa tilmaan wanaagsan, oo ku tusinaysa sida qalbigiisu uga buuxo talo saarashada Alle (CW) iyo kalsoonida adag ee uu ku qabo toosnaanta diinta uu dadka ugu yeerayo, laakiin waxaa dhici karta in qofka mu'minka ah uu ku dhaco khalad aad u weyn, taasoo ah in islaweyninka uu iskala weynyahay xumaanta uu badalo inuu iskala weynaado dadka uu u yeerayo, islaweyninkaas qalloocanna waa dhagar kamid ah dhagaraha nafta, taasoo malaysiisa qofka inuu ka weynyahay dadka kale, ayna tahay inuu ka fogaado si uusan ugu wasaqoobin fasaadkooda, jahligooda, iyo liidnaantooda, marka uu heerkan gaarana ma ah mid kamida ah ducaadda inyar iyo in badan midna, balse waxa uu ku noqonayaa culays. Daaciga waxaa laga doonayaa inuu ka sara maro xumaanta ee ma aha inuu iska saraysiiyo dadka uu dacwada ugu yeerayo, balse waa in uu Alle (CW) uga mahadceliyo sharfidda uu ku sharfay inuu dadka dacwada ugu yeero, jacaylkooda, sabarkooda, iyo

dhaqaajinta khayrka ku duugan, sidaa ayuuna islaweyndiisa ku dhigi karaa makaankeeda saxda ah, ugana badbaadi karaa dhagarta nafta, taasina waa isla weynida xaqa iyo mabda' ku dhisan ee ma aha mid ku dhisan qof iyo xisbi.

### 83- **Baashaal Macno La'aan ah oo Maanka Dooriya**

Waxyaabaha nafta dhagra waxaa ka mid aha inay isugu yimaadaan qaar kamid ah ducaadda munaasabado kala duwan, oo aan waxtar u lahayn hawsha dacwada, iyaga oo sheekaysanaya, kana sheekaynaya arrimo badan oo Bari iyo Galbeed ka dhaca, dhaliiilana u jeedinaya dad, hay'ado, kana carooda dhacdooyin dhacay, kuna hamiya dhacdooyin kale oo ay jeclaan lahaayeen inay dhacaan, kadibna kala taga ayaga oo aan wax nafci leh qaban, iyaga oo isu haysta inay Alle u cudaardaar sheegteen, oo ay intii karaankooda ah ay diintiisa u gargaareen, xaqiiqaduna waxa ay tahay, inaanay wax gargaar ah u qabanin diinta Alle, balse waxa ay naftooda ku dhagreen hadal tiro ay markii ay muddo jooganba ku rogaal celiyaan, si ay waqtiga firaaqada ah isku dhaafiyaan, hadalkana ay uga baahi bogtaan, shaqadooda noocan ah waa neef iska saarid been ku dhisan oo ay iska saarayaan dareenka ay dareemayaan rabitaan ah in diinta Alle loo shaqeeyo, taasoo ay naftooda ku khiyaamayaan, barkoodna uu barka kale ku khaldayo, ayna isku dhaafsanaayayaan raali ahaansho khayaal ku dhisan, ayna ka cararayaan waajibaadkooda xqiiqiga ah, ayna u labisayaan fadhiidnimadooda iyo quustooda iyo hadal tiradooda dhar diimeed oo aysan mutaysan.

### 84- **Dhexdhexaadnimo iyo Toosnaan**

Islaamku waa diinta dhexdhexaadnimada iyo toosnaanta, waxa uuna ka fog yahay labo arrimood oo la dhaliilay, gaboodfal iyo xadgudub, Alle (CW) muslimiinta ayuu amaanay isaga oo leh " وَكَذَٰلِكَ جَعَلْنَاكُمْ أُمَّةً وَسَطًا " البقرة:١٤٣ , "Saasaan idinka dhignay ummad caadil (kheyr ah)"

Albaqra:143, oo loola jeedo toosnaan iyo akhyaarnimo, waayoo arrimaha kuwooda dhexdhexaadka ah ayaa ugu kheyr badan, xadgudubka iyo gaboodfalkana waa labo arrimood oo la dhaliilay, dhexdhexaadnimada Islaamkuna waxa ay ka muuqataa dhamaan qeybaha kala duwan ee nolosha taasoo uu Islaamku u yimid inuu habeeyo oo maamulo maadaama uu yahay diin dhamaystiran, ahna diintii diimaha khatintay. Muslimku – Tusaale –ahaan kama zaahido nolosha adduunayada heer gaarsiiya inuu ka ka sii jeesto camiritaanka adduunyada iyo horumarinteeda, iyo inuu kaalintu uu ku leeyahay ka qaato, dabadeedna uu ku noqdo culeys, sidoo kalana waa inaanu aduunyada ku qamaamin sidii qof waalan oo doonaya inuu wax walba gacanta ku dhigo, haseyeeshee si miisaaman oo toosnaan leh ayuu wax uga qabsadaa, sida dhexdhexaadnimada iyo toosnaanta loogaga baahan ayahay camiraataanka dunida iyo horumarinteeda, iyo baadigoobka risqiga, ayaa sidoo kale loogaga baahan yahay cibaadada, deeq bixinta, macaamalaadka, dhar-xirashada, iyo isu miisaamidda baahida qofka iyo kooxda, xuquuqda iyo waajibaadka, jirka iyo ruuxda, caqliga iyo qalbiga iyo wixii la halmaala si aan ka badbadin iyo ka dhimis midna lahayn. Gaboodfalka waa la dhaliilay waayoo waxa uu dayacayaa masaalix badan oo dadku qof ahaan iyo koox ahaan u leeyihiin. Xadgubintana waa la dhaliilay waayoo waxa ay khilaafsantahay fidrada ban’iiaadamka oo aanan qaadi karin, sidaa darteed waqti dheer ma sii socon karo, wuxuuna faraqa ku sitaa wixii isaga baab’in lahaa, sidaa darteed ayuu Alle (CW) doortay in Islaamku ahaado diin dhexdhexaad ah oo toosan, maadaama uu isagu abuuray dadka, waajibaadna dusha ka saaray, uuna yaqaano dabeecadiisa, kartidiisa, taag daridiisa iyo awoodiisa.

### 85- **Khilaaf iyo Khilaaf**

Islaamku waxa uu sara u qaaday wanaaga iyo qiimaha midnimada, aad buuna u dhiira galiyay, wuxuuna ka digay khilaafka, hase ahaatee

wuxuu sugay kala duwanaanta aadanaha taasoo qasab ka dhigaysa inuu yimaado khilaaf, taasoo ah mid kamida sunnada rabaaniga ah ee Alle ku abuuray koonkan. Khilaafku waa labo nooc: mid wanaagsan iyo mid xun, khilaafka wanaagsan waa kala gadisanaanta fekradaha, taasoo ah mid waxtar u leh aadanaha, lana jaan qaadaysa dabeecadda ban'iiaadmka, sida kolba xikmadda Ilaahiga ahi keento, Alle (SW) waxa uu doonay in uu dadka abuuro ayaga oo kala duwan, dhanka caqliga, fahamka, fekerka, dabeecadda, midabka, miisaanka, iyo qaabka.

Khilaafka xun waa: khilaafka ay is khilaafto quluubtu, kaasoo xaaraan ahaanshihiisa ay aayado iyo axaadiis badan ku soo arooreen oo ay kamid tahay qawlka Eebbe: " وَاعْتَصِمُوا بِحَبْلِ اللَّهِ جَمِيعًا وَلَا تَفَرَّقُوا" آل عمران:١٠", "Qabsashada xadhiga Eebbe (Islaamka) dhamaantiin hana kala tagine" Aala Cimraan:103, khilaafka nacfiga leh waa kan kala duwaanashaha, kaasoo lamid ah inaad shiddo shumacyo dhawr ah, mar kasta oo aad shumac shiddo waxaa kordha iftiinka, ee shidaalka midka dheeriga ah keeni maayo inuu damo mid horay u shidnaa, khilaafka xuna waa kan iska soo horjeedsashada, kaasoo keenaya loolan iyo is qabqabsi, dhamaan kuwa is khilaafsanna ka dhigaya kuwa taagdaran oo faashiliin ah, waxaase muhim ah inaan hoosta ka xariiqno in Islaamku leeyhay goob xiran, oo aysan marnaba ahayn inuu gaaro khilaafku, waayoo waxa ay masalaysaa saldhigyada Islaamka ee aan is badalin taasoo ummadda u dhawraysa haybteeda, ruuxdeeda, risaaladeeda, midnimadeeda xaga caqiidada, dhaqanka, dareenka kuwaa oo ah ( caqiidada, cibaadaadka, akhlaaqda, iyo axkaamta qadciga ah), arrinkaa oo dalbaya in la barto fiqhiga khilaafka iyo aadaabtiisa, iyo sugitaanka xaqa dadka kale u leeeyihiin inay na khilaafaan maadaama aanu ka baxsanayn xuduudaha sharci ahaan la ogolyahay in la is khilaafi karo, taasoo ay kamid tahay kala gedisnaanta aragatiyaha la xiriira hababka iyo waddooyinka hawsha lagu fulinayo kuwaa oo noocyo badan yeelan kara, islana badali kara hadba xilliga iyo goobta la joogo.

## 86- **Carar iyo Carar**

In badan oo kamid ah ducaadda waxay dib ugu laabtaan taariikhdii wanaagsanayd ee ummaddu soo martay, wey ka sheekeeyaan, ku geeraaraan, kuna abtirsadaan, iyaga oo aanan wixii uu karay ee hawl ah ha badnaadaan ama ha yaraadaane aanan qabnin, asaga oo u haysta in sheekadan uu sheegayo ay ka furanayso gaboodfalka uu sameeyay

Dhinaca kale waxaa jira ducaad dul istaaga silica iyo il xumada ka muuqata ummadda, oo cabasho, oohin, dagaal, iyo in ay masuuliyadda dusha ka saaraan – sax iyo khalad mid ay ahaataba- dhinacaa ama dhinaceer, iyaga oo aanan waxba ka qaban wixii karaankooda ahaa oo ay qaban kareen ha weynaadaan ama ha yaraadaane, ayaga oo u haysta taasi inay ka ridayso masuuliyadda. Waxaa jira nooc sadaxaad oo ku hawlan mustaqbalka isla markaana aan wax hawl ah qabanynin, kuwaasoo filanaya imaanshaha Imaamkii cusboonaysiin lahaa diinta, Mahdigii la sugayay ama Hogaamiye Ilhaam leh, ama Halyey samatabixiye ah, iyagoo is moodsiiya in imaanshaha imaamkaasi uu fure u yahay xalka wax kasta oo mashaakil ah oo jira, iyo xaqiijinta wax kasta oo lagu naaloodo, iyagoon xisaabta ku darsan sunooyinka Alle ee kawnka, qawaaniinta aan cidna u xaglinin, iyo sida caadudu tahayba.

Qolooyinkaa sadaxda ahba waxay ka cararayaan sida xaqiiqada ah gudashada mas’uuliyadda saaran, oo ay awood u leeyihiin inay wax ka qabtaan, waxayna ku marmarsoonayaan cillooyin ka dhashay caajisnimadooda, naftooda uun bayna dhagrayaan, dacwada iyo nolosha guud ahaanna culays bay ku yihiin. Waxa loo baahan yahay in qofka muslimka ahi garto xaqiiqada dacwadiisa, xilligiisa, iyo waxa karaankiisa ah ee uu qaban karo inuu qabto, kadibna uu si ikhlaas iyo hagaag leh u guto, ha yaraato ama ha waynaato e, waayo waxyaabaha yaryar oo la isu geeyo unbaa noqda wax wayn, dhibicyo la isu geeyayna wabi ayeey noqdaan. Alle hadii uu ka arko adoomadiisa waxqabad

ikhlaas iyo hagaagsanaan leh waa uu ka aqbalaa oo barakeeyaa, intii uu doono ha la ekaado e, ummadduna waxa ay ka heshaa miro wanaagsan iyo shaqo wacan.

87- **La Falgalka Fidnooyinka**

Markasta waxaa muslimiintaa soo foodsaara fidnooyin iyo arrimo maldahan sida in dad diin laawayaal ahi ku xadgudbaan shaarfta Alle (CW) ama ta Rasuulka Suuban (SCW), ama lagu xadgudubo jaaliyad muslim ah, ama mid kamid aha muqadasaadka muslimiinta, ama la gilgilo mid kamida ah saldhigyada ummadda, iyo wixii la halmaala. Ujeedooyinka qarsoon ee arimahaas ka dambeeya waa ay kala duwan yihiin waxayna noqon karaan nacayb, gardaro, aqoon la'aan, magac doonasho, ama kala dhantaaalid awoodda iyo dadka mukhlisiinta ah ee muslimka ah, taasoo looga weecinayo goobaha saxda ah ee ay tahay inay ku wajahaan dadaalkooda. Waxaana laga doonayaa ducaadda inay awood u leeyihiin kala saarista sababha kicinaya cadaawaddan, ayna la falgalaan iyaga oo eegaya wax ka dambeeya, masaalixda ay leeyihiin iyo natiijada ay beegsanayaan, iyadoo qaar arrimaha ay ka aamusayaan, qaarna ay ka bixinayaan jawaabo lagu fadeexaynayo iyaga oo aan carrrabbaynin jihada, kuwa kalana uu uga jawaabo iyagoo magacooda sheegaya, marka ducaaddu ay ka hortaaga iyo muwaajahada samaynayaanna inay si aad u xeeldheer u xisaabtamaan oo aa aanay xadka dhaafin, waayoo haddii uu xadka dhaafo dedaalkiisa waa uu khasaariyay, waxa uuna ku dhacay wixii ay sharwadayaashu doonayeen oo ah iney maaweeliyaan, daaliyaan, awoodiisana kala dhantaalaan, oo ay kadibna farxaan, isla markaana u diyaariyaan waxyaabo cusub oo ay ku kicinayaan shucuurta dadka muslimiinta ah si ay hawshooda u wataan sidii ay ugu talo galeen.

### 88- **Marka Mudnaanta la Siinayo Waxa Laga Fiican yahay**

Waxaa jira xulashooyin fiqhi iyo dacwadeed oo ay dadku adeegsadaan, taasoo ka dhalata duruufaha, xaladaha, fahamyada iyo heerarka cilmiyeed ee kala duwan, xikmadda kamid ma aha in qof uu ra'yigiisa iyo xulashadiisa ku qasbo dadka kale, haba rumaysnaado inay tahay mida ugu saxsan uguna fiican, in aan mid sax ah ku heshiino ayaa ka kheyr badan in aan ku kala tagno midka ugu saxsan, in kan laga fiicanyahay aan ku heshiino ayaa ka kheyr badan in aan ku dirirno kan ugu fiican.

### **89- Dacwada Guud**

Markii la joogo goobaha lagu wacyi galinayo dadwaynaha waxaa haboon in lagu soo bandhigo xaqiiqooyinka lawada ogyahay ee Islaamka, waana in dhinac la iska dhigo khilaafaadka culimada fiqhiga ah, riwaayadaha ghariibka aha, fasiraadaha caqliga ka fog, iyo mala awaalka cilmiyeed ee suurogalka ah iyo kuwa aan suurogalka ahayn, furuucda faraha badan badan ee axkaamta ama sii mala awaalista dhici karta iyo kuwa aan dhici karinba, dhamaan arrimaha waxa ay leeyihiin meelo loogu talogalay, dadka aqoonta u leh ayaana ka doodaya iyaga oo raacaya qodobo nidaamiya, eegayna hadba baahida loo qabo in arrimahaa laga hadlo, dawdweynaha guud ahaan iyo da' yarta waxaa iyaga laga doonayaa inay isku hawlaan waxyaalaha camaliga ah ee anfacaya.

### 90- **Gooni la Noqosho loo Baahan Yahay**

Waxa waajib nagu ah inaan jeclaano oo aan qadarino culimada iyo muslixiinta ah, kuwoodii hore iyo kuwooda hadda joogaba, oo aan Alle u barino, kuna dayano, haseyeeshee marna ma banana inaan muqadas ka dhigno, mana aha inaan taajaaribtooda soo min guurino si xaraf xaraf ah anaga oo is halmaansiinayna waxyaabaha gaarka noo ah oo ay tahay

inaan tixgelino xaga waqtiga, goobta iyo duruufta intaba, sidaa darteed waa inaan dedaalno sidii ay u dedaaleen, una tixgelino waxyaabha gaarka noo ah sidii ay kuwooda u tixgeliyeen.

## 91- Waa Caado ee Diin ma aha

Mararka qaarkood waxay caadooyinka, dhaqamada iyo hidaha qaarkood yeelanayaan awood ka dhigaysa inay u muuqdaan diin iyaga oo aanan diin ahayn, waxaana arrimaha laga dheehan karaa munaasabadaha farxadda, murugada, iyo guud ahaan xiriirka bulshadeed, iyo gaar ahaan aragtida laga qabo haweenka, sidaa darteed ayaa loo baahan yahay inaan kala saarno caadada iyo diinta, cadada inaan ogolaano iyo inaan diidno waa inay ku xirnaato waxa ay diintu ka qabto.

## 92- Mu'minka Awoodda Badan

Waxaa nagu waajib ah inaan diyaarino qof mu'min ah oo dhamaystiran ama awood badan leh, waayo sida axadiista Nabiga (SCW) ku tilmaaman Alle m'uminka awoodda badan ayuu ka jecelyahay kan tabarta yar. Sida awoodda mu'minka loogu qiyaaso saxnaanta caqiidadiisa, xeeldheerida iimaankiisa, toosnaantiisa akhlaaqeed, garashadiisa iyo caqli badnaantiisa, ayaa sidoo kale loogu qiyaasaa awoodiisa jireed, tanina waxa ay naga doonaysaa inaan daryeelno jirkeena si isu dhamaystiran oo dheelitiran, taasoo ku imanaysa in lagu dedaalo wax kasta oo nafci leh sida raashinka, cayaaraha jirdhiska, nadaafadda iyo wixii la halmaala, iyo in laga digtoonaado wax kasta oo dhib leh sida mukhadaraadka, sigaarka, khamriga iyo wixii la halmaala, dhamaan arrimahaana waxaa ku jira faa'iidooyin faro badan oo ay kamid yihiin; in jirku awood u yeesho qaadista culaysyada hawsha dacwada, si himmad iyo karti leh.

## Gabagabo

Waxaa dhab ah inay Shuuciyadii burburtay muddo labaatan sano ka hor ah, halka hantigoosadka reer galbeedka uu ku jiro imtixaan adag, waxaana gilgilanaya mabaad'iidii waaweynayd ee ay ku taagnay, tiirarkii saldhiga u ahaana waxaa la iska weydiinayaa su'aalo waaweyn, waxaana muuqda in sabaabihii siinayay awoodda ama gacanta sare inay dib u sii guranayso, maalin kastana waxyaabo hoos u dhigaya ayaa ku soo kordhaya, Sunooyinka Alle (CW) ma gafaan umana turaan qofna.

Dhab ahaantii dunida baaqi kuma ah qof awooddiisu karsiinnayso inuu baadbaadiyo ban'iiaadamka adinka oo ducaadda Islaamka ah mooyee, ee waa inaad gaartaan heerka sare ee diintiinu gaarsiisan tahay, iyo heerka casrigiinu gaarsiisan yahay, si aad u noqtaan naakhuudayaasha markabka, naftiinana aad wanaag u samaysaan, iyo sidoo kale dhamaan dadka muslimiinta ah iyo kuwa aan muslimiinta ahaynba.

Mas'uuliyadiinu waa mid guud oo ku dheresan waqtiga, goobta iyo dadka, dacwadiinuna waa mid naxariiseed, shareeca fudud, oo culeys iyo ciriir ka qaadaysa dadka, una turaysa dhamaan dadka ku nool dunida, waxaan la idinkaga baahanyahay inaad garataan muhimmaddan garasho wanaagsan, oo aad ogaataan inaad tihiin ducaad ee aydan ahayn garsoorayaal wax xukumaya, kuwa wax hagaajinaya ee aan ahayn kacdoon, kuwa wax dhisaya ee aan ahayn kuwa wax duminaya, kuwa naxariista oo aan xaasidiin ahayn, waxaad u dhaqamaysaan sida aabuhu ula dhaqmo wiilkiisa, dhaqtarkuna dadka uu daaawaynayo, waxaadna ka fogaanaysaa sida ay u askarta xabsigu ula dhaqanto maxaabiista, iyo dhaqanka ninka caraysan ee aargudashada u socda.

Marka aad sidaa samaynaysaan waxaad tihiin kuwa toosan oo wax toosinaya, kuwa hanuunsan oo wax hanuuninaya, iyo kuwa ugu anfaca badan addomada Alle (CW), makhluuqaadkuna waa ciyaalka Alle, Alle

waxa uu ugu jacayl badan yahay kan ugu waxtarka badan ciyaalkisa, marka aad sidaa yeeshaan ayeey dadku hogaankooda idiin dhiiban doonaan si aad ugu hogaamisaan kheyrka, nuurka, iyo nabadda.

Qoraalkan yar waxa lagu ururiyay qodobo dhawr ah oo soo jeedin ah, bilawgeeda iyo dhamaadkeeduna waa miraha khibrad dheer, aqris joogto ah, aragti xeeldheer, tajaarib faraha looga gubtay iyo dabagal joogto ah, ujeedadeeda laga leeyahayna waa in la hordhigo muslimiinta guud ahaan, iyo hogaamiyayaashooda si gaar ah, si ay u noqoto axdi haga hawsha dacwada, iyo dastuur fekradeed iyo mid hawlgal, taasoo kordhinaya baaxadda heshiiska, saxnaanta, firfircoonida, yaraynaysana baaxadda khilaafka, gafka, iyo hawlgabka.

Waxaa laga rajaynayaa in ducaadda Islaamku ay siyaan fursad ay ku daraaseeyaan, oo ay ra’yigooda uga dhiibtaan haddii ay wax ka jarayaan ama ku darayaan ama daraasooyin kale ay ku biirinayaan, ama ay wax ka badlaayaan ama ay kala hormarinyaaan, ama qiimayn ku samaynayaan.

Annaguna waxaan u ballan qaadaynaa in walaalaha qiimaha badan ee noo soo jawaaba aan tixgelin, qadarin iyo mahad baalaaran uga hayno, welibana waxa aan ka codsanaynaa inay u arkaan qoraalkan inuu yahay mid ay leeyihiin oo dhankooda ka yimid, jawaabta ay doonayaanna way noo soo qori karaan, iyaga oo mahadsan Alle agtiisana ajar ka helaya.

Talooyinka oo si cad loo soo bandhigo, si furana looga doodo, waa habka ugu wanaagsan ee lagu kala saari karo khaladka iyo saxa, arrintan ayaana ah tan nagu dhalisay in aan dhaqaajino himmadda ducaadda, si aan uga faa’iidaysano ra’yigooda, waxna ugu toosino, si ay u noqoto mid u dhaw dhanka dhamaystirka, kadibna ay noqoto mid la hor dhigi karo hay’adaha iyo jamciyaadka Islaamiga ah, taasoo ah hadiyad aan u dirayno, si ay uga qaadato hay’ad kasta iyo jamciyad kasta wixii

munaasib ku ah iyada, arrinkaas ayuuna kheyr badan ku jiraa Alle(CW) idankii.

Alle ayeey kaalmada iyo tawfiiqdu ka timaadaa, waxaanan weydiisanaynaa Alle (Hufnaaye) inuu na waafajiyo raali ahaanshihiisa, daacadiisna noo jiheeyo, asaga ayaa wax walba awoodee.

**Dhamaad**

*Fikirka axdi sharafeedkan waa u yeeritaan guud ahaan muslimiinta, iyo gaar ahaan ducaadda loogu yeerayo inay isugu yimaadaan oo ku kulmaan qodoba dhawr ah iyo mabaadi' si wadar ahaan ah u saamaynaya axdi sharafeed u gaar ah dacwadda, iyo dastuur dhaqameed xagga fekerka iyo hawlgalka ah, taasoo kordhinaysa baaxadda heshiiska, saxsanaanta, iyo firfircoonida. Waxayna yaraynaysaa baaxadda khilaafka, gefafka iyo hawlgabka.*

*Ujeedada axdi sahrafeedkan waa in la baahiyo is jacayl iyo kalsooni ducaadda dhexdooda ah, isu soo dhawaansho iyo dhiirigelin dhaliilaha wax dhisa, iyo ballaarinta xuduudaha fekerka iyo argtiyaha, in laga baaraan dego dhinacyada hal abuurka iyo cusboonaysiinta, in la isugu kaalmeeyo waxa heshiiska lagu yahay, in la isu saamaxo waxa la isku khilaafsanyahay, iyo in laga baxo xayndaabka hawlgabnimada loona baxo xayndaabka firfircoonida iyo hawlkarnimada.*

*Axdigan wuxuu higsanayaa inuu noqdo "warqad shaqo" oo laga soo qalin daartay quraanka kariimka iyo sunnada daahirka ah, kaasoo ka fog xadgudub iyo gaboodfal, una taagan dhexdhexaadnimo iyo toosnaan, mana sito midab xisbi oo gooni ah, isbahaysi gooni ah, koox gaar ah, dugsi dacwadeed, ra'yi fiqi ah, taageero gobol gooni ah, umana ololaynayo mid kamid ah dhinacyada aan soo sheegnay, kamana hor imanayo, sharafteedana meel ugama dhacayo.*